Waalidiinta iyo Daryeelayaasha

Tusaha kala doorashada 14-19

2008-2009

Waxaa kale oo laga heli karaa internetka
www.connexions-direct.com/parentcarer

Macluumaadka aad u baahan tahay si aad uga caawiso ilmahaaga aan qaangaarin in ay sameeyaan...
Kala doorashada maaddooyinka Sanadka 9’aad iyo mehnadaha iyo kala doorashada waxbarashada Sanadka 11’aad

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha

Tusaha kala doorashada 14-19

Ilmahaaga yar ee aan qaangaarin waxay marayaan marxaladdii lagu waydiinayay in ay kala doortaan maaddooyinka derejooyinka aqoonta ee ay qaadan lahaayeen Sanadaha 10'aad iyo 11'aad. Waa waqti aan iyaga oo qura muhiim u aheyn ee laakiin xattaa wuxuu muhiim u yahay adiga waalidka ah ama daryeelayaasha. Waxaad u baahnaan doontaa in aad hubiso sidii aad ku heli laheyd macluumaadka aad u baahan tahay si aad u caawiso ilmahaaga aan weli qaangaarin bacdamaa caawimaaddaada iyo taageeradaadu muhiim u yihiin howsha.

Isbedellada waxbarashada waxaa loola jeedaa in da'yart heli karaan waqtigan la joogo in ay kala doortaan koorsooyin xiiso leh kuwaas oo u horseedi karo waddooyin kala duwan oo ay ku gaari karaan fasalka form'ka lixaad, kuleejka, jaamacadda iyo goobaha kale ee shaqada.

Buuggan yari wuxuu kuu sheegi doonaa:

- waxyaalaha ku cusub waxbarashada
- koorsooyinka la heli karo
- waxa loola jeedo derejo aqooneedyada kala duwan iyo halka ay kuu horseedayaan.

Waxaa kale oo aad ka heli kartaa:

- tallooyin dhaxalgal ah oo ku saabsan sidii aad uga caawin laheyd ilmahaaga aan qaangaarin sidii ay wax u kala dooran lahaayeen
- su'aalaha la waydiiyo dudgsiga
- meelaha laga heli karo caawimaad dheeraad ah.

Kala doorashada Sanadka 9'aad ayaa waxaa lagu muujiyaa go'aamada qaybtooda hore. Waxaa jiri doono kala doorashooyin badan Sanadka 11'aad iyo wixii kasii sareeyo, sidaas darteedna waxaad xattaa heli doontaa macluumaad ku saabsan:

- kala doorashooyinka ka dambeeyo 16 – wixii la baranayo iyo halka laga baranayo labadaba
- derejo aqooneedyadu halka ay ku geyn karaan
- taageerada maaliyadeed 16'ka ka dib.

Qaybta interactive'ka ah ee tusahan
Waxa aad ka heli kartaa qaybta interactive'ka ah ee tusahan qadka online'ka ah
www.connexions-direct.com/parentcarer
Macluumaadka ku jiro tusahan wuxuu badanaa kugu xirayaa baraha internetka.
Haddii uusan Kombiyuutar guriga kuu oolin, adiga iyo ilmahaagu waxaad internetka ka heli kartiin maktabadda dadweynaha ee degaanka ama xarunta Connexions'kae.

Mahadcelin:
Waxaanu jeclaan laheyn in aan uga mahadcelino Machadka Jaaliyadda Ringmer (Ringmer Community) ogolaanshihii uu inoo ogolaaday in aan sawirro ka qaadno.
Waxaa kale oo aan jeclaan laheyn in aan u mahadcelino dhalin yaradii naga ogolaatay in lagu sameeyo arrin daraaseynta Waalidiinta iyo Daryeelayaasha (Parents & Carers). Sababo qarsoodinimada la xiriiro dartood waxaa dhici karto in magacyada qaar la bedelay.

Waaxda Carruurta, Dugsiyada iyo Qoysaska (Department for Children, Schools and Families) (DCSF) mas'uul kama aha waxyaalaha ku qoran ama sida la isugu haleyn karo baraha internetka ku qoran daabacaaddan mana ayideyno aragtiyada ku dhex qoran. Qoritaanka waa in aan loo qaadan ayidaad nooc kasto oo ay tahay. Ma damaanad qaadi karno in barahan internetku shaqayn doonaan waqti kasto manaa koontarooli karno sida loo heli karo iyo waxyaalaha ku qoran baraha internetka ee aan taxnay.

Lambarro telefoon ayaa lagu bixiyay buuggan yar. Wicitaanada ku socdo Connexions Direct ee laga soo dirayo telefoonka caadiga ah waa bilaash, laakiin telefoonada gacanta waxaa dhici karto in lacag la isku dallaco. Wicitaanada ku socdo ururada kale ee laga soo wacayo telefoonka caadiga ah waxaa dhici karto in lacag isku dallaco telefoonka gacantana sicirkiisu wuu kasii sareeyaa.

Tusmo

Guul loo dhan yahay	4
Kala doorashada Sanadka 9’aad	7
Yaa wax caawin karo?	11
Sidee baad wax u caawin kartaa?	14
Dariiqyada Waxbarashada	17
Taageeridda waxbarashada iyo horuumarka	18
Kala doorashada Sanadka 11’aad	22
Taageero maaliyadeed 16’ka ka dib	26
Kala doorashooyinka 18’ka ka dib	29
Waxyaalaha dhalinyaradu ka welwelaan	33

Halkee la aadayaa hadda? Sida loo doorto ikhtiyaarada Sanadka 9’aad. Buugyarahan wuxuu ka caawinayaan ilmahaaga aan qaangaarin in uu go’aan ka gaaro koorsooyinka iyo derejooyinka aqoonta ee Sanadka 10’aad iyo kan 11’aad.

Adiga ayay kuu taallaa. Macluumaad ku saabsan shaqada iyo waxyaalaha la kala dooran karo ee ardayda Sanadka 10’aad iyo kan 11’aad. Buugyarahan wuxuu ka caawin karaa ilmahaaga aan qaangaarin in ay go’aan ka gaaraan kala doorashadooda 16’ka ka dib.

Dugsiga ilmahaaga aan qaangaarin waa in uu siiyaa nuqul ah buugyaraha ku haboon.
Taa bedelkeeda, waxaad nuqul ka soo guurin kartaa ama ka eegi kartaa qaybta interactive’ka ah ee Xagee la wajahayaa hadda? (Which way now?) halkan **www.connexions-direct.com/whichwaynow** ama waa ikhtiyaarkaaga halkan **www.connexions-direct.com/itsyourchoice** ama nuqul ka dalbo DCSF Publications halkan 0845 602 2260.

Guul loo dhan yahay

Dib u habeynta waxbarashada
Kala doorasho, isbedbedel iyo barnaamijyo gaar ah – kuwani waa qaar ka mid ah horuumarka xiisaha leh ee ka jiro dugsiyada ay dhigtaan ilmahaaga aan qaangaarin manta. Wax kasta oo uu ilmahaaga aan qaarin xiisihiisa iyo awooddiisu tahay waxaa jiri doono wax u qalmo, oo ay la socdaan derejo aqooneed ka caawinayo in ay guul ka soo hooyaan waxbarashada iyo shaqada dunida.

Isbedellada waxbarashada 14-19 waxaa loo horuumarinayaa si:

- sare loogu qaado heerarka si da'yartaadu u helaan xirfadaha ku haboon si ay u dabooli karaan baahida isbedeleyso ee dunida una sii wadi karaan waxbarashada inta ay nool yihiin
- loo siiyo fursadaha waxbarashada kala duwan si loogu ogolaado da'yarta in ay gaaraan rejadooda ugu sareyso
- loogu soo bandhigo koorsooyin iyo derejo aqooneedyo kala duwan kuwaas oo dhiirigelinayo mashquulna a dhigayo da'yarta.

Waa maxay faa'iidada ay isbedelladani u keenayaan ilmahaaga aan qaangaarin?
Faa'iidada dhabta ee ay helayaan ilmahaaga aan qaangaarin waa in dariiqyada loo maro waxbarashada ay hadda yihiin kuwa isbedeladaya ardayguna uu dooran karo marxalad kasta oo go'aan la gaarayo dariiqa ku haboon. Waxaad ogaan doontaa in derejo aqooneed kasta ee lahayo uu si uun ugu xiran yahay dariiqa horuumarka adigoo ka eegayo garaafka dariiqyada waxbarashada **bogagga 17**, iyo sidoo kale kiis barashada, waxaad arki kartaa sida ay ardayda ugu sahlan tahay in ay u wareegaan dariiq ka dariiq.

Maxaa cusub?
Dibloomada
Tani waa derejo aqooneed cusub oo ku saleysan habab waxbarasho iyo waxbaris kala duwan, iyo sida ay ugu tahay ikhtiyaar xiiso leh ilmahaaga aan qaangaarin si uu u tixgeliyo. Dibloomadu waxay kulmineysaa waxbarasho galaaska lagu qaadanayo iyo howl gacanta laga qabanayo oo khibrad laga helayo, oo ay ku jirto ugu yaraan toban maalmood oo lala shaqeynayo loo shaqeeye.

'Naf ku soo celinta waxbarashada' ('Bringing learning to life') ayaa ah dhambaalka ugu muhiimsan ee derejo aqooneedkan loogu talo galay 14-19 sano jirka. Iyadoo qayb ka ah Dibloomada, ardaydu waxay baranayaan qaybaha ay maadadu dabooleyso (oo loo yaqaan 'qadka waxbarashada' ('line of learning') ee ay doorteen kana barteen xirfado kala duwan, oo ay ku jiraan Ingiriis, xisaab iyo tignoolajiyadda macluumaadka iyo isgaarsiinta (ICT). Waxaa kale oo ay wax ka dooran karaan fursado waxbarasho kale oo dheeraad ah takhasusna leh. Dibloomada waxaa la diyaariyay iyadoo lala kaashanayo loo shaqeeyayaasha, dugsiyada, machadlyada iyo jaamacadaha waxaana loo bixiyaa seddax heer. Dibloomada waxaa loo dejiyay si ay uga caawiso ilmahaaga aan qaangaarin go'aan ka gaaridda mustaqbalkooda iyadoo ikhtiyaarkooda oo dhan uu furan yahay. Waxay u isticmaali karaan cago-saarta waxbarashada sare, tabarka iyo shaqada.

Diblooyinka lagama heli karo weli meelkasto, laakiin waxaa hadda laga dhigaa dugsiyo la xulay, machadyo iyo meelaha lagu bixiyo waxbarashada shaqada ku saleysan. Marka la gaaro 2013, dhammaan maadooyinka Dibloomada waxaa heli doono dhammaan da'yarta.

Wixii warar dheeraada oo ku saabsan Dibloomooyinka ah ka eeg Kala doorashada Sanadka 9'aad **bogagga 7-10**.

Ballaarinta Tababarrada Da'yarta
Tababarka da'yartu wuxuu siiyaa dhalinyarada tijaabada shaqooyinka, iyagoo waxbarashadooda wata. Waxaa heli karo dhalinyarada da'doodu tahay 14-16. Qorshuhu wuxuu noqday mid lagu guuleystay iyadoo dadka ka soo qaybgalayo ay sii kordhayaan wuuna sii fidayaa sidaas darteed meelo badan oo shaqo ayaa xattaa la heli doonaa.

Wixii dheeraada ah oo ku saabsan Tababarrada Dhalinyarada ka eeg Kala doorashada Sanadka 9'aad halkan **bogagga 7-10**.

Isbedellada GCSE
- Isbedelka ugu weyn ee GCSE waa soo saarista qiimeynta gudaha ee howsha koorsada, iyadoo ay ardaydu ku sameyn doonaan projects'yo uu dugsigu koontaroolayo.
- Laga bilaabo bisha Sibteembar 2009, GCSE howsha koorsooyinka sagaal maaddo, oo ay ku jiraan suugaanta Ingiriiska, juqraafi iyo taariikh, waxaa lagu bedeli doonaa qiimeynta gudaha.

Wixii warar dheeraada ah oo ku saabsan GCSE ka eeg Kala doorashada Sanadka 9'aad **bogagga 7-10**.

Isbedellada Heerarka A
- Waxaa jiro afar qaybood madooyinka intooda badan.
- Waxaa jiro su'aalo badan oo faahfaahin u baahan marka 2010 laga bilaabana derejo cusub ayaa la bixin doonaa si loo qiro guusha ardayda ugu awoodda badan.
- Project'ga lagu daray waa derejo aqooneedka Heerka 3'aad oo cusub oo loo dejiyay in lagu horuumariyo xirfado cusub oo ay waxbarashada sare u baahan tahay. Waa qayb qasab ah oo ka mid ah Dibloomada Sare waxaana loo heli karaa iyadoo la dooranayo oo ku dhex jirto koorsooyinka Heerka A.

Wixii warar dheraada ah oo ku saabsan Heerka A ka eeg Kala doorashada Sanadka 11'aad **bogagga 22-25**.

Xirfadaha lagu shaqeeyo
Xirfadaha lagu shaqeeyo waa Ingiriis, xisaab iyo xirfadaha ICT ee uu qof kasta ugu baahan yahay in uu kula tacaalo nolol maalmeedkiisa – guriga, waxbarashada, dibadda iyo nawaaxiga, iyo shaqada. Xirfadaha lagu shaqeeyo waxay qayb ka yihiin dhammaan Dibloomooyinka waxayna dhawaan qayb ka noqon doonaan GCSE yada la xiriiro iyo qorshayaasha sida Tababarrada Da'yarta. Laga bilaabo 2010, waxaa xattaa la heli doonaa iygaoo ah derejo aqooneed gooni ah.

Isku xirka derejo aqooneedyada iyo heerarka
Dhammaan derejo aqooneedyada waxaa loo qaybiyaa sagaal heer waxayna ku wada fadhiyaan hal qaabdhismeed. Heerarka kala duwan waxaa lagu qiimeeyaa xirfadaha ay u baahan yihiin kuwa waxbaranayo. Marka uu heerku sii kordhaba waxaa sii ballaaranayo aqoonta, xirfadaha iyo fahamka la isaga baahan yahay derejo aqooneedka.

Koorsooyinka kuu horseedayo derejo aqooneed kasta waxay ku kala duwanaan karaan waxa ay ka kooban yihiin, qaabka loo baranayo iyo habka loo qiimeynayo. Hal qayb oo noocyada ka mid ah waa Shahaadada Guusha ee lagu qaato Heerka Bilowga, dhanka kalana waxaa jiro qalin jebin sare iyo xirfadaha derejo aqooneedyada.

Hoos waxaad ka eegi kartaa sida derejo aqooneedyada kala duwan la isugu dubariday heer kasta, bogagaa 17'na waxaad ka eegi kartaa sida ilmahaaga aan qaangaarin u qaadi karaan waddooyin kala duwan marka ay ka gudbaan hal heer ilaa heer kale si ay u gaaraan bartilmaameedkooda.



Derajo aqooneedeyada Heerka Bilowga

Dhammaan derejo aqooneedyada heerka Bilowga waxaa loogu yeeraa Shahaadooyinka Heerka Bilowga. Waxaa lagu dhisaa aqoonta aasaasiga ah, xirfadaha iyo fahamka maaddooyinka gaarka ah. Waxay dhisaan kalsoonida waxayna ka caawiyaan dadka in ay isku diyaariyaan derejo aqooneedyada Heerarka 1'aad iyo kan 2'aad haddii ay doonayaan in ay sidaa yeelaan.

Derejo aqooneedyada Heerka 1'aad

Derejo aqooneedyada waxaa ka mid ah Derejo aqooneedyada Xirfadaha Qaranka (National Vocational Qualifications) ee Heerka 1'aad, GCSE ee lagu qaato derejooyinka D-G, Dibloomada Aasaasiga ah, BTEC Shahaadooyinka Bilowga ah iyo Dibloomooyinka, iyoAbaalmarinada City & Guilds ee Asaasiga ah (Foundation). Waxaa lagu horuumariyaaa aqoonta asaasiga ah, fahamka iyo xirfadaha maadada, meelaha shaqo ee gaarka ah ama qayb dhaqaale oo ballaaran. Waxay dadka ka caawiyaan in ay dadku u isticmaalaan waxbarashadooda xaaladaha maalin kasta iyo shaqooyinka. Waxaa kale oo ay ka caawiyaan dadka u diyaargarowga derejo aqooneedyada Heerka 1'aad iyo derejo aqooneedyada Heerarka 2'aad iyo 3'aad.

Derejo aqooneedka Heerka 2'aad

Derejo aqooneedyadan waxaa ka mid ah Derejo aqooneedyada Xirfadaha Qaranka ee Heerka 2'aad, GCSE ee lagu helo derejooyinka A*-C,Dibloomada Sare, BTEC Dibloomada Koowaad iyo City & Guilds Abaalmarinada Dugsiga dhexe.Intermediate Awards. Waxaa lagu dhisaa aqoonta, fahamka iyo xirfadaha maaddooyinka, meelaha shaqooyinka gaarka ah ama qaybaha waaweyn ee dhaqaalaha. Waxay dadka u suurtogeliyaan in ay u isticmaalaan waxbarashadooda howlo badan oo kala duwan waxaana kale oo ay ka caawiyaan u diyaargarowga derejooyinka aqoonta kale ee Heerka 2'aad derejo aqooneedyad Heerka 3'aad.
Inta badan loo shaqeeyayaashu waxay heerkan u isticmaalaan baahidooda asaasiga ah ee ugu hooseyso.

Derejo aqooneedka Heerka 3'aade

Derejo aqooneedyadan waxaa ka mid ah Derejo aqooneedyada Xirfahada Qaranka ee Heerka 3'aad, Heerarka AS iyo A,Dibloomada Sare ee Casriga ah, Baccalaureate'ka Caalamiga ah, BTEC Abaalmarinta Qaranka iyo City & Guilds Abaalmarinada Sare. Waxaa lagu kordhiyaa aqoonta faahfaahsan, fahamka iyo xirfadaha maaddooyinka, meelaha shaqooyinka gaarka ah ama qaybaha waaweyn ee dhaqaalaha. Waxay dadka u suurtogelisaa in ay u isticmaalaan waxbarashadooda howlo badan oo kala duwan. Waxaa kale oo ay ka caawiyan u diyaargarowga derejooyinka aqoonta kale Heerka 3'aad iyo derejooyoinka aqoonta ee Heerka 4'aad.
Jaamacaduhu waxay u baahan yihiin in soo codsadayaasha intooda badan ay ku soo baaseen heerkan. Loo shaqeeyayaashu waxay sis ii kordheyso u raadinayaan codsayaal ugu yaraan ku soo baasay heerkan.

Derejo aqooneedyada Heerarka 4 - 8

Derejo aqooneedyadan waxaa ka mid ah Derejo aqooneedyada Xirfahada Qaranka ee Heerka 4'aad iyo kan 5'aad, digriiyada Caadiga ah iyo digriiyada honours'ka ah, Shahaadada Qaranka ee Sare iyo Dibloomooyinka, xirfadaha derejo aqooneedyada gaarka ah iyo derejo aqooneedyada waxbarashada sare. Waxaa ka mid ah si hoose u barashada doorarka shaqooyinka gaarka ah. Waxay dadka ka caawiyaan in ay ku takhasusaan waxyaalaha ay baranayaan ama shaqada.

Kala doorashada Sanadka 9’aad

Sanadka 9’aad, ilmahaaga aan qaangaarini waa in ay go’aansado qaar ka mid ah koorsooyinka iyo derejo aqooneedyada ay doonayaan in ay bartaan Sanadaha 10 iyo 11. Kani waa waqti muhiim ah waxayna u badan tahay in ay u baahdaan gacansiintaada.

Qof kasta wuxuu qaataa maaddooyin isku xiran:
- Ingiriis
- xisaab
- saynis.

Ilmahaaga aan qaangaarin waxaa laga qaadi doonaa imtixaan, badanaa GCSE, kuna saabsan seddaxdan maaddo.

Waxaa sii dheer, waxaa jiro maaddooyin kale oo qasab ah:
- tignoolajiyada macluumaadka iyo isgaarsiinta (ICT)
- barashada mehnadaha
- muwaadinnimada
- barashada jirdhiska (PE)
- barashada diimaha
- barashada galmada iyo xiriirka
- wax barashada la xiriirto shaqada.

Dhammaan dugsiyadu waa in ay bixiyaan maaddooyinkan, laakiin waxay go’aan ka gaari karaan haddey koorsado ku dhamaato derejo aqooneed. Dugsiyada qaar ayaa laga yaabaa in ay leeyihiin maaddooyin kale oo qasab ah.

Derejo aqooneedyada iyo kala doorashada koorsooyinka
Dhammaan dugsiyadu ma bixiyaan kala doorasho isku mid ah, sidaas darteed waxaa muhiim ah in aad hubiso waxa laga helayo dugsiga uu dhigto ilmahaaga aan qaangaarin. Kala doorashooyinka iyo heerarka ay bixiyaan dugsiyadu way kala duwan yihiin. Arinta muhiimka ahi waxaa weeye in ilmahaaga helo koorso ay xiiseynayaan oo ku haboon awooddooda. Sidan ayay u badan tahay in ay ku guuleystaan waxbarashadana iyo tababarkana ku sii wadaan 16’ka ka dib.

Shahaadada Guud ee Dugsiga Sare (GCSE)
Ardayda ku jirto Sanadka 10 iyo 11 intooda badan waxay bartaan GCSE. Marka lga soot ago maaddooyinka guud iyo kuwa qasabka ah, dugsiyada intooda badan waxay bixiyaan maaddooyin kala duwan oo la kal doorto. In badan oo kuwan ka mid ah waa caan laakiin waxaa marxaladdan ku jiri karo maaddooyin cusub, iyo sidoo kale kala doorashada maaddooyin leh waxyaalaha gacanta laga qabto, sida caafimaadka iyo daryeelka bulshada ama raaxeysiga iyo dalxiiska.

- GCSE waxaa caadiyan lagu dhameeyaa labo sano.
- GCSEyada labada abaalmarin leh waxaa ku jiro cinwaano badan waxayna u dhigantaa labo GCSE oo buuxdo. Badanaa tani waxay la macno tahay in jadwalku waqti dheeraad ah ku qaadan doono.
- Qaar GCSE yada ka mid ah, sida barashada muwaadinnimada, waxaa loo helaa sida ‘maaddooyin gaagaaban’, kuwaas oo u dhigmo qayb GCSE yada ka mid ah. Waxay tani mar kale ka muuqan doontaa jadwalka waxaana dhici karto in ay ardayda ku qaadato arintan waqti gaaban.

Si aad u aragto sida ay isagu xiran yihiin derejo aqooneedyada kala duwan iyo halka ay kuu horseedayaan, ka eeg garaafka dariiqyada waxbarashada bogagga 17.

Koorsooyinka Heerka Bilowga
Haddii ay u badan tahay in ilmaaga uu ku adkaado GCSE, waxaa jiro koorsooyin ah Heerka Bilowga oo lagu helo Shahaadada Guusha. Waxaa lagu qiimeeyaa imtixaano iyo shaqo koorso iyo caddeynta portfolio'da taas oo muujineysay wixii la gaaray. Waxay u horseedi karaan GCSE ama koorsooyinka Heerka 1'aad iyo 2'aad. Hubi si aad u aragto waxa uu bixiyo dugsiga ilmahaaga.

Dibloomada

- Ardayda doorato Diblooomada waxay sameyn karaan iyadoo barbar socoto ama lagu bedelanayo GCSE, waxayna sii wadi doonaan barashada Ingiriiska, xisaabta iyo ICT.
- Tani waa derejo aqooneed cusub oo ku salaysan hab gaar ah oo waxbaris iyo waxbarasho.
- Waxa jiro toban Dibloomo oo hadda la heli karo qaar bandanna way soo scodaan.
- Dibloomada waxay kulmineysaa waxbarashada galaasyada iyo khibradda waxyaaalaha gacanta laga qabto, oo ay ku jirto fursad lagula shaqeynayo ugu yaraan toban maalmood loo shaqeeye.
- Waxay leedahay waxyaalo la kala dooran karo iyo kuwo qasab ah. Waxyaalaha qasabka ahi waxay daboolayaan arimaha muhiimka ah ee uu ilmahaagu u baahan yahay in uu ogaado marka laga reebo maaddooyina la kala dooran karo (oo loo yaqaan 'qadka barashada') iyo xirfadaha ay loo shaqeeyayaasha, jaamacadaha iyo machadyadu doonayaan. Waxyaalaha la kala dooran karo waxay noqon karaan koorsooyin gaar ah kuwaas oo siinayo ilmahaaga faham hoose oo ku saabsan wixii ay doorteen, ama wax aad uga duwan oo ballaarinayo waxbarashadooda.
- Qiimeynta waxaa ka mid ah imtixaan qoraal ah iyo shaqo koorso.
- Dhammaan ardayda Dibloomada waxay dhameystiraan project'yo si ay u muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha ay barteen.

Dibloomadu waxay leedahay seddax heer:

- Diblomada Asaasiga waa derejo aqooneedka Heerka 1'aad. Waxayna si buuxdo ugu dhigantaa shan GCSE.
- Dibloomada Sare wa derejo aqooneedka Heerka 2'aad. Waxayna si buuxdo ugu dhigantaa todobo GCSE.
- Dibloomada Horuumarsan, ee loogu talo galay kuwa ka weyn 16, waa derejo aqooneedka Heerka 3'aad. Waxay si buuxdo u qaadataa sameynteedu waqti la mid ah seddax iyo bar Heerarka A. Tan bedelkeeda waxaa geli karo Dibloomada Horuumarka (oo iyaduna ah Heerka 3'aad) taas oo ay qaadato sameynteedu qiyaas ahaan waqti la mid ah labo iyo bar Heerarka A. Tani waxay ku fiican tahay ardayda aan dooneyn in dhameeyaan Dibloomada Sare oo dhan.

Dibloomooyinka la heli karo Sibteembar 2009:
Ganacsiga, Maamulka iyo Maaliyadda
Dhismaha iyo Dhismaha Deegaanka
Hindisaadda iyo Warbaahinta
Injineernimada
Deegaanka iyo waxbarada Dhulka la xiriirto
Barashada Timaha iyo Qurxinta
Soo dhaweynta
Tignoolajiyadda Malcuumaadka
Naqshadeynta Badeecada iyo Wax-soosaarka
Bulshada, Caafimaadka iyo Horuumarinta

Bacdamaa ay Dibloomadu tahay derejo aqooneed cusub, meel kasto weli lagama heli akro. Hubi waxa laga heli karoo nawaaxigaaga adigoo ka eegayo qadka online'ka ah ee 14-19 Buugga macluumaadka nawaaxiga. Macluumaadka ku saabsan sida loo daalacan karo waxaa laga heli karaa halkan **www.direct.gov.uk/14-19prospectus**

Si aad u ogaato in badan oo ku saabsan Dibloomooyinka booqo
www.direct.gov.uk/diplomas

Derejo aqooneedyada shaqada la xiriiro
Dugsiga ilmahaagu dhigto waxaa dhici karto in uu xiriir la leeyahay machad degaanka ku yaal si uu u bixiyo koorsooyinka shaqada la xiriiro oo meelaha qaar quseeyo. Taaqadashada arintan waxaa badanaa ka mid ah in ilmahaagu dugsiga ka maqnaanayo qayb ka mid ah todobaad kasta. Koorsooyinkan waxaa laga helayaa meelo badan oo shahaadooyin bixiyo, waxaana ka mid ah tusaale ahaan NVQ ee Heerka 1'aad iyo 2'aad iyo City & Guilds ee Heerka 1'aad iyo 2'aad. Qiimeyntu waxay badanaa ku saleysan tahay howsha gacanta laga qabanayo taas oo muujin kartoo xirfadaha iyo aqoonta.

Tababarrada da'yarta (YA)
Qorshaha tababarrada da'yarta (YA) waxaa bixiyo dugsiyo sii kordhayo si ay ardaydu u baran karaan derejo aqooneedyo gaar ah oo shaqo la xiriirto. Barnaamijka noocan ah, ardaydu waxay badanaa joogaan dugsiga seddax maalmood, iyagooo baranayo maaddooyinka caadiga ah, labada maalmood ee hartayna waxay ku bixiyaan dibadda ama machad nawaaxiga ku yaal ama tababar bixiye ama goob shaqo oo uu joogo loo shaqeeyaha ku haboon.

Marka la dhameeyo qorshaha YA, ardaydu waxay awoodi doonaan in ay toos ugu biiraan tababar waqti buuxo oo oah meelaha ay dooortaan ama waxay ka sii wadan karaan waxbarashadooda waqtiga buuxo, ama dugsi ama machad. Ka hubi dugsiga ilmahaagu dhigto haddii laga helayo tababarrada da'yarta.

Doorashada koorsooyinka ee 14-19
Haddii aad dooneyso in aad hesho dhammaan macluumaadka ku saabsan koorsooyinka laga heli karo nawaaxigaaga, booqoo
www.direct.gov.uk/14-19prospectus
Wuxuuna kani ku siindoonaa xiriirada Prospectus'ka Nawaaxigaaga (Area Prospectus) ee 14-19 jirada. Riix oo kali ah 'Halka aan ku noolnahay?'waxaadna arki dooontaa khariidad taas oo kuu saamixi doonto in aad eegto prospectus'ka nawaaxigaaga.

Arrin Daraaseyn: Daniel
Daniel wuxuu ku jiraa Sanadka 9'aad wuxuuna doortay in uu sameeyo Dibloomo ah Hindisaadda iyoo Warbaahinta (Creative and Media) Sanadka 10'aad iyo 11'aad oo uu la wadayo GCSE ah xisaab, saynis, Ingiriis iyo taariikh. Wuxuu jecleystay fursadda uu ku baranayo koorso ballaaran oo shaqo xiriir la leh taas oo siin doonto fursad uu ku horuumariyo hindisaadda maskaxdiisa.

'Waxaan weligeey jeclaa figradda ah sameynta filimada ama barnaamijyada; si aan u arko qoraalk oo warqad ku qoran ilaa shaashadda laga daawado.'

Weligiis wuxuu xiiseyn jiray filimaanta iyo warbaahinta, Daniel wuxuu arki karayaa in Dibloomadu ay ka caawineyso horuumarinta si muhandisnimo ah u isticmaalidda luuqadda iyo sidoo kale horuumarinta xirfadihiisa ICT, iyadoo ay sii dheertahay barashada xirfadaha gaarka ah ee kombiyuutarka sida animation'ka.

Daniel wuxuu awoodi doonaa in uu barto dhinacyada kala duwan ee warbaahinta. Wuxuu si gaar ah u xiiseynayaa daawashada xayaysiinta TV'ga ee lagu duubay studio'ga degaanka ka dibna isagoo isticmaalayo arintan in uu qoro arintiisa gaarka ah ee ay u xilsaareen golaha degaanka.

Daniel aabihii wuxuu ka shaqeeyaa wakaaladda filimada iyo TV'ga wuxuuna si buuxdo ugu taageeray doorashada koorsada Dibloomada ah. Wuxuu u arkaa in ay leedahaay faa'iido la taaban karo oo aan aheyn oo kali ah xagga shaqada, laakiin waxay xattaa aqoon durugsan siineysaa marka lagu daro xirfadaha qaxaqabad iyo GCSE.

Daniel aabihii wuxuu ku biiray wakaaladda iyo TV'ga markii ka baxay dugsiga wuxuuna yiri:

'Haddii aan baran lahaa koorso tan oo kale ah ka hor intii aanan shaqada bilaabin, waxaan ka heli lahaa faa'iido la taaban karo ku biiritaanka wakaaladda.'

Yaa wax caawin karo?

Dugsiyadu way soo dhaweeyaan taageerada ay bixiyaan waalidiinta iyo daryeelayaasha waana in ay idinka qaybgeliyaan howsha go'aan gaarista.

- Dugsiyadu waxay badanaa bixiyaan macluumaad daabacan oo ku saabsan waxyaalaha la kala dooran karo Sanadka 9'aad, waxay geliyaan macluumaadka barta internetka dugsiga waxayna badanaa, leeyihiin galabta macluumaadka si ay kuu siiyaan faahfaahin dheeraad ah.
- Waxaad caawimaad waydiisan kartaa macalimiinta dhigo maaddoyinka gaarka ah iyo kuwa wax tababaro bacdamaa ay ilmahaaga aad u garanayaan iyo sida ay ula socdaan maaddooyinka kala duwan.
- Dugsiga ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa isku xiraha mehnadaha kaa talo ka siin karo doorashada koorsooyinka iyo gaar ahaan sida ay ugu haboon tahay waxbarashada mustaqbalka, tababarka iyo kala doorashada mehnadaha. Ilmahaagu waxaa kale oo uu qaadan doonaa casharro lagu baranayo mehnadaha kuwaas oo daboolayo koorsooyinka iyo derejo aqooneedyada lagu qaato Sanadka 10'aad iyo 11'aad iyo sida ugu haboon ee loo doorto. Waxay baranayaan waxyaalaha ku saabsan qiimaha ay leedahay khiradda shaqadu sida loo hiigsado waxbarashada mustaqbalka, tababarka iyo mehnadaha.

Yaa kale oo wax caawin karo

La taliyayaasha gaarka ah ee Connexions
La taliyayaasha gaarka ah ee Connexions waxay bixiyaan macluumaad, talo iyo tusaale ku saabsan koorsooyinka, fursadaha tababarrada iyo mehnadaha waxayna ka caawin karaan in ilmahaagu go'aano qaato. Waxay tagaan dugsiyada sidoo kalana waxay ka shaqeeyaan xarumaha, sida xarumaha dhalinyarada. Waxay ogyihiin doorka aad ku leedahay taageerada ilmahaaga waxaadna kula kulmi kartaa la talaliyaasha gaarka ah ee Connexions dugsiyada ama xaruntaad degaanka ee Connexions.

Connexions Direct
Kani waa adeeg loogu talo galay 13-19 sano jirka kaas oo siinayo talo iyo macluumaad degdeg looga heli karo, ama barta internetka ama iyadoo lala xiriirayo Connexions La taliyaha Direct'ga ah. Adeegga waxaa klae oo heli karo waalidiinta/daryeelayaasha.

Connexions Direct waxa aqbalaan wicitaanada laga bilaabo 8'da subaxnimo ilaa 2'da duhurnimo, todobo maalmood todobaadkii. Ka wac halkan 080 800 13 2 19, dhambaal qoraal ah ugu dir halkan 07766 413 219, ama la tilayaha kula hadal qadka online'ka ah aam e-mail uga soo dir barta intenetka **www.connexions-direct.com**

Wixii warar dheeraada ah oo ku saabsan sida Connexions kuu caawin karaan, ka eeg waxyaalaha ay da'yartu tabanayaan **bogagga 33–35**.

Mutadawiciinta iyoka lato bixiyayaasha waxbarashada
Dugsiyo badan ayaa leh mutadawiciin iyo ka talo bixiyayaasha waxbarashada kuwaas oo ilmahaaga ka caawin karo sidii ay uga guuleysan lahaayeen waxyaalaha xanibayo waxbarshadooda. Waad waydiin kartaa hadduu dugsiga ilmahaagu leeyahay qorshaha talo siinta.

Qaybaha Waxbarasho Taageeridda
Dugsiyada qaar ahaa Qaybaha Waxbarasho Taageeridda, halkaas oo uu ardaygu ka heli karo taageero dheeraad ah haddii aysan sifiican wax ugu baran galaasyada caadiga ah. Waydii dugsiga ilmahaaga wixii faahfaahin ah.

Caawimaad loogu talo galay da'yarta ay waxbarashadu ku adagtahay iyo/ama cuuryaamiinta ah
Dhalinyarada qaba baahi gaar ah ama cuuryaannimo waxay taageero iyo caawimaad dheeraad ah ka heli karaan la taliyayaashooda gaarka ah ee Connexions iyo Isku xiraha dugsiga Baahida Waxbarasho ee Gaarka ah (SENCO).

Qorshayaasha Xilliga kala guurka
Da'yarta heysto qoraallada baahida waxbarasho ee gaarka ah waa in ay, sharci ahaan, lahaadaan qorshaha waxbarashada mustaqbalka oo la isla ogolaaday laguna qoray dokumeentiga formalka ah ee loo yaqaan qorshaha xiliga kala guurka. Waxaa lagugu casuumi doonaa dib u eegista Sanadka 9'aad (xiliga kala guurka), caadiyan adigooo la socdo ilmahaaga, halkaas oo aad ka heli doonto fursad aad ku sheegto wixii aad dooneyso in lagu daro qorshaha xilliga kala guurka, iyo in aad arintan kala hadasho macalimiinta iyo Isku xiraha Baahida Waxbarasho ee gaarka ah. Lataliyaha gaarka ah ee Connexions ee ilmahaaga waxaa kale oo uu gacan ka geysan doonaa qoritaanka qorshaha wuxuuna bixin dooonaa caawimaadda hadda socoto in la dhaqan geliyoo. Taageerada ay dhalinyaradu ka helayaan Connexions oo uu wehliyo qoraal ah baahida gaarka ah ayaa la sii wadi doonaa ilaa ilmuhu ka gaarayoo da'da 25.

Taageerada network'ga ah
Marka uu ilmahaagu qaboo baahi gaar ah ama cuuryaanimo, waxaa jiro dhowr arimood oo laga fikiro, sida helitaanka daryeelka caafimaadka ugu wanaagsan,ama daweynta dabiiciga ah, ku taageeridda dugsiga iyo baaritaanada adeegyada iyo fursadaha la heli karo. Waxaa jiro ururro isku xiran oo ku siin karo taageero iyo macluumaad si ay kaaga caawiyaan in aad ka guuleysato caqabadahan.

Jadwalka hoose wuxuu qorayaa qaar ka mid ah ururada taageerada arimahan quseyso iyo baraha internetka muhiimka ah.

Kuma	**Maxay**	**Meelma**
La xiriir Qoys	Waxay bixiyaan talo iyo taageero waxayna kugu xiri karaan qoyska xaaladdaada oo kale ku jiro.	0808 808 3555 Telefooonka qoraalka ah: 0808 808 3556 **www.cafamily.org.uk**
Directgov: macluumaadka adeegyada dadweynaha	Macluumaad ku saabsan xuquuqaha dadka cuuryaamiinta ah, waxbarashadooda iyo manfacyada ay heli karaan.	Guddiga Sinaanta Xuquuqda Bini'aadamka: 0845 604 6610 Telefoonka qoraalka ah: 0845 604 6620 Qadka Manfac Waydiinta: 0800 882200 Telefoonka qoraalka ah: 0800 243355 **www.direct.gov.uk/DisabledPeople**
Network'ga Waalidinta Cuuryaamiint ah	Macluumaad iyo taageero loogu taloo galay waalidinta cuuryaamiinta ah iyo qoysaskooda iyo saaxiibadoood.	0870 241 0450 **www.disabledparentsnetwork.org.uk**
Network'ga Wadashaqeynta Waalidiinta (NPPN)	Waxay bixiyaan macluumaad, talo iyo taageer loogu talo galay waalidiinta heysto dhalinyaro qabo baahi gaar ah. Waxay ku siin karaan faahfaahinta xiriirka ku saabsan adeegyada	**www.parentpartnership.org.uk** Waydii wixii faahfaahin ah Isku xiraha Baahida Waxbarasho ee Gaarka ah. 020 7843 6058

	degaankaaga waxayna kugu xiri karaan ururada kale ee muhiimka ah.	
Hay'adda samafalka Shaw	Taageero loogu taloo galay da'yarta cuuryaamiinta ah ee donayo shaqo iyo tababar.	01225 716300 **www.shaw-trust.org.uk**
Xirfad: Xafiiska Qaranka ee Ardayda Cuuryaamiinta ah	Waxay bixiyaan macluumaad la xiriiro waxbarashada, tababarka iyo shaqada loogu talo galay ardayda cuuryaamiinta ah.	0800 328 5050 Telefoonka qoraalka ah: 0800 068 2422 **www.skill.org.uk**
Teachernet	Bar internet oo ay ku jiraan macluumaad loogu talo galay waalidiinta iyo daryeelayaasha heysto ilmo qabo baahida waxbarasho ee gaarka ah.	**www.teachernet.gov.uk**
Network'aga Macluumaadka Xilliga kala guurka	Network'ga ururada iyo shakhsiyaadka bixiyo macluumaadka iyo taageerada loogu talo galay dhalinyarada cuuryaamiinta ah, waalidiintooda iyo daryeelayaasha.	020 7843 6006 **www.transitioninfonetwork.org.uk**

Arrin daraaseyn: Jake
Jake wuxuu ku jiraa Sanadka 11'aad wuxuuna bartaa Shahaadada Heerka 1'aad ee ah barashada Matoorka Baabuurta isagaa la barto maaddooyinka GCSE. Iyadoo koorsada qayb ka ah wuxuu xaadiraa machadka hal maalin todobaadkii.

Jake wuxuu doortay koorsada maxaa yeelay wuxuu doonayay in uu sameeyo wax gacanta laga qabto wuxuuna xiiseynayay gawaarida. Waxaa kale oo uu xiiseynayay in uu barto GCSE ee PE iyo barashada adabka aadanaha. Wuxuu kala hadlay waxyaalaha uu doortay macalimiintiisa, waalidkiis iyo lataliyayaasha gaarka ah ee Connexions ka hor inta uusan qaadan go'aanka kama dambeysta ah.

Waalidiinta Jake waxay markii hore ka welwelsanaayeen waxyaalaha ku saabsan cawaaqibka barashada GCSE yar. Waxaa loo ballan qaaday si kastaba ha ahaatee in ay koorsadu u horseedeyso derejo aqooneed oo Jake uu weli ku baran doono todobo GCSE kale ah dusiga.

Jake wuu ku raaxeystay koorsada wuxuuna in badan ka bartay aadista machadka.

'Koorsadu waxay aheyd mid xiiso leh waxaana la kulmay dad kala duwan. Aad ayay u wanaagsaneyd in aan sameeyo wax gacanta laga qabanayo dugsigana laga maqnaado todobaadkii hal mar. Waxaan ogaaday howlaha qoraalka qoraalka ah in ay igu yara adag yihiin waxaana jecleystay fursadda aan ku muujinayo waxa aan qaban karo anigoo gacmaheyga isticmaalayo.'

Inkasta oo uu Jake ku raaxeystay koorsada oo uuna ka keenay derejooyin wanaagsan, wuxuu misna go'aansaday in uu ka shaqeeyo dhismaha wuxuuna rejeynayaa in uu bilaabo tababar marka uu dhameeyo Sanadka 11'aad.

'Weli waxaan heystaa derejada aqoonta heerka 1'aad waxaana u isticmaali karaa in aan barto koorsooyin kale waxaana bartay xirfado dhaxalgal ah. Waxaan la kulmay dad cusub waxaana kordhiyay kalsoonideyda, taas oo waxtar u leh mustaqbalka.'

Sidee baad wax u cawin kartaa?

Ilmahaaga aan qaangaarin waa in uu noqdaa lafdhabarta howlaha go'aan gaarista, waxaana muhiim ah in ay iyagu howsha horboodaan. Haseyeeshee, waxay u baahan doonaan taageeradaada. Ku dhiiri geli in ay kaalintooda ciyaaraan ayna arintan u arkaan hab wanaagsan oo ay ku qaadayaan mas'uuliyadda waxbarashadooda. Hubi in ay hayaan figrad ku saabsan kala doorashadooda, iyo waxa ay ula jeedaan, iyadoo aan aheyn Sanadaha 10 iyo 11 oo kali ah, laakiin ah mustaqbalka.

Ka bilow helitaanka macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah
Si aad wax u caawiso, waxaa muhiim ah in aad fahamto sida uu manhajku isku bedelayo si loola kulmo waxyaalaha kala duwan ee la xiiseynayo iyo sida ay dhalinyaradu jecel yihiin in ay wax u bartaan. Ogow intii suurtagal ah koorsooyinka kale duwan ee la heli karo.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan talo iyo gacan siinta la heli karo, ka eeg Yaa wax caawin karo? (Who can help?) bogagga **11-13**.

Maskaxda ku haay arimaha saameynta ku yeesho goo'aanada
Isku day in aad hubiso in ilmahaagu uusan doorasho u sameyn sababo qaldan. Arintan waxaa keeni karo:

- Iyago odoonayo in ay sameeyaan waxa ay saaxiibadood sameeyaan, iyagoo aan eegeyn in ay ku haboon tahay iyaga. Haddii ay ilmahaaga arintani heysato, waxaad caawin kartaa adigoo eegayo in ay la qabsan karaan galaasyada iyagooo aan gacan ka heleyn saaxiibadood, sameynayo koorso ay ku raaxeystaan welina saaxiibadood la kulmayo xiliyada fasaxyada iyo dugsiga ka dib. Waxaa dhici karto in yeeshaan saaxiibo cusub.
- Waxay jecel yihiin macalimiinta. Ka caawi si ay u ogaadaan in arintani aysan aheyn sabab u qalanto in ay ku sameeyaan koorso aan ku haboooneyn.
- Waxay koorsada u arkaan doorasho sahlan. Sidaa uma sii sahlanaan doonto haddii ay howsha ku caajisaan – waxaanu dhammana ognahay sida ay u sahlan tahay in lagu dadaalo howl haddii aad xiiso u heyso. Xeerar iyo cabirro isku mid ah ayaa lagu dabaqaaa dhammaan koorsooyinka isku wada heerka ah, haddey tahay waxbarashada jirdhiska ama xisaabta.
- Waxay u galaan koorsada iyagoo ku fikirayo in ay tahay koorso 'wiilal' ama koorso 'gabdho'. Ka caawi in ay ka gudbaan fikirka jinsiga ayna raacaan wixii xiiseynayaan iyo awooddooda.
- Waxay garan waayeen, ama fahmi waaye, waxay koorsadu ku saabsan tahay.
- Waxayna xaqiiqiyan fahamsaneyn aqoontooda ama awooddooda – waxyaalaha ay rejeynayaan ayaa laga yaabaa in ay khiyaali aad u yihiin ama dabcan waxay hoos u dhigayaan kala doorashadooda.

Dhibaatooyinka jadwalka waxay la macno noqon karaan in aysan sameyn karin isku darka doorashooyinka ay doonayaan. Haddii ay arntani dhacdo waxaa lagaaga baahan yahay in aad ka caawiso ilmahaaga tixgelinta arimo kale.

Hadda waxaa la heli karaa koorsooyin badan, ilmahaagu wuxuu u baahan yahay dhiirigelin uu ku doorto koorsooyn waaweyn oo isku dheeli tiran kuwaas oo kala doorashada ka dhigayo kuwo furan 16'ka ka dib.

Su'aalaha la tixgeliyo

Maxay ku raaxeystaan?

Waxay u badan tahay in ilmahaagu howl ku guuleysto haddii ay xiiseynayaan oo ay ku raaxeystaan. Guud ahaan maaddooyinka ay ku raaxeystaan ayaa noqon doono kuwa ay natiijada fiican ka keenayaan. Waxaa jiro mararka qaarkood waxyaalo cajiib ah, sidaas darteed ogow waxyaalaha ay xiiseynayaan dugsiga gudihiisa iyo dibaddiisa.

Maxay ku wanaagsan yihiin?

Waa kuwee maaddooyinka ay ilmahaagu natiijo fiican ka keenaan dugsiga? Xattaa, ogow waxyaalaha ay ku wanaagsan yihiin dugsiga dibaddiisa.

Sidee bay jecel yihiin in ay wax u bartaan?

Ka fikir koorsooyinka ku haboon qaabka ilmahaagu wax u barto. maaddooyinka qaar ayaa u baahan waxbarasho ku saleysan galaasyo badan qaar kalana waxay noqon karaan waxyaalaha gacanta laga qabto oo shaqada la xiriiro. Waxaa kale oo aad ogaataa, in ilmahaagu aad ugu jajaban yahay waxyaalaha caanka ah ama in uu ku faraxsan yahay waxyaalo cusub?

Maskaxda ma ku hayaan wax mehnado ah?

Haddii ilmahaagu maskaxda ku hayo mehnad gaar ah, waxay u baahan yihiin in eegaan nooca derejo aqooneedyada ay u baahan yihiin mustaqbalka sida ugu shaqeeyaan. Hubi waxa ay hadda dooranayaan in ay ku haboon yihiin. Waydii lataliyahooda gaarka ah ee Connexions ama si toos ah ula xiriir machadyada ama jaamacadaha.

Ma u baahan yihiin macluumaad iyo talo dheeraad ah?

Haddii uusan ilmuhu wax mehnad ah maskaxda ku heyn, ku dhiiri geli in ay raacaan xirfadahooda iyo waxyaalaha ay xiiseynayaan ayna doortaan maaddooyin kala duwan oo kala doorashadooda ka dhigayo mid furan mustaqbalka. Haddii ay u baahan yihiin macluumaad iyo talo dheeraad ah ku dhiirigeli in ay la hadlaan lataliyahooda gaarka ah ee Connexions ama isku xiraha mehnadaha iyo macalimiinta maaddooyinka.

Liiska hubinta ee waalidiinta

- Ma ka jirtaa dugsiga dhacdo ku saabsan macluumaadka kala doorashada?
- Ma jiraa buugyaraha kala doorashada kaas oo qorayo maaddooyinka iyo koorsooyinka la heli karo?
- Imisa doorasho ayaa loo baahan yahay in la sameeyo?
- Dugsiga qasab miyuu ka dhigaa wixii maaddo dheeraada ah (sida luuqadaha ajnabiga ee casriga ah)?
- Waa kuwee Dibloomooyinka degaanka lagag helo?
- Ma garaneysaa sida loo daalacdo Prospectus Nawaaxiga (Area Prospectus)ee qadka online'ka ah ee 14-19 (**eeg bogga 9'aad**)?
- Lataliyaha gaarka ah ee Connexions Malaga helayaa dhacdada macluumaadka kala doorashada haddii aad dooneyso in aad ballan la sameysato?
- Ma jirtaa fursad lagula hadli karo macalimiinta maaddooyinka ee joogo dhacdada macluumaadka kala doorashada?

Xarunta Waalidiinta

Qadka online'ka ah'dukaan-mar-joogsi ah' oo laga helayo macluumaad iyo taageero loogu talo galay waalidiinta iyo daryeelayaasha oo ku saabsan sida caawimaad looga geysto dhan kasto oo ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, oo ay ku jiraan arimaha la xiriiro kala doorashada Sanadka 9'aad, iyo isku xirayaasha baraha internetka kale. Ka eeg barta internetka halkan **www.direct.gov.uk/parents**

Arrin Daraaseyn: Jemma
Jemma waxay ku jirtaa Sanadka 11'aad waxayna qorsheyneysaa in ay barato Heerarka A. Wax mehnad ah figrad kama heysato waxayna dooneysaa in ay kala doorashadeeda ka dhigto mid furan.

Jemma waxay kala hadashay macalimiinta, tababarayaasha machadka, lataliyaheeda gaarka ah ee Connexions iyo waalidiinteeda waxyaalaha ku saabsan kala doorashada maddooyinkeeda. Waxay dooratay dhaqaalaha, Ingiriis, naqshadeynta garaafyada iyo xisaab, waayo way xiiseyneysaa wayna ku raaxeysatay. Waa maaddooyin ballaaran oo ka dhigayo kala doorashadeeda mid furan.

Jemma weli go'aan kama gaarin in ay dhagato foomka lixaad ama machad. Lataliyaheeda gaarka ah ee Connexions ayaa kula taliyay in ay hesho machadyo kala duwan intii suurtagal ah iyo foomka lixaad ka hor inta aysan doorashada sameyn.

'Iyadoo qayb ka ah cilmi-baaristeyda, waxaan aaday maalmaha dadka oo dhan u furan ee foomka lixaad iyo machadka waxaana kala hadlay tababarayaasha koorsooyinka. Waxaa kale oo aan la hadlay ardayda, si aan u ogaado sida ay la tahay, iyo macalimiinteyda, saaxiibada iyo qoysaska si loo helo kala doorasho badan si aan go'aan u gaari karo.'

'Ogow intii aad ogaato waxyaalaha ku saabsan meelaha wax lagu barto iyo koorsooyinka ay bixiyaan, bacdamaa ay dhammaan kala duwan yihiin. Midda kale, meel ha u dooran saaxiibkaa ayaa halkaa dhigto darteed ama adigoo u malaynayo in uu yahay doorasho sahlan. La hadal dad badan intii suurtagal ah, laakiin ugu dambeyntii go'aanka adigaa iska leh, sidaas darteed gaar go'aanka saxda ah.'

Dariiqyada waxbarashada

Derejo aqooneed kasta oo uu ilmahaagu helo aaqirka Sanadka 11'aad – Heerka Bilowga, Heerka 1'aad ama Heerka 2'aad – waxay heli doonaan fursad ay ku horuumarayaan. Garaafkani wuxuu muujinayaa sida derejo aqooneedyadu kuugu xirayaan dariiqyada. Gadaal ka eeg **bogga 6**'aad si aad u ragto tusaalooyinka derejo aqooneedyada heer kasta.



Entry Level

Certificates of Achievement

Level 1

Five GCSEs at grades D-G
Work-Related Qualifications
Young Apprenticeships
Foundation Diplomas

Level 2

Five GCSEs at grades A*-C
Work-Related Qualifications
Apprenticeships
Higher Diplomas

Level 3

A Levels
International Baccalaureate
Work-Related Qualifications
Advanced Apprenticeships
Advanced Diplomas
Progression Diplomas

Levels 4-8

Higher National Diplomas
Foundation Degrees
Higher National Certificates
Honours Degrees

Employment

Heerka Bilowga

Shahaadooyinka Guusha

Heerka 1'aad

Shan GCSE oo ah derejada D-G
Derejo aqooneedyada Shaqada la xiriiro
Tababarrada da'yart
Dibloomada Asaasiga ah

Heerka 2'aad

Shan GCSE oo ah derejada A*-C
Derejo aqoodneedyaa Shaqada la xiriiro
Tababarrada da'yart
Dibloomo Sare

Heerka 3'aad

Heerarka A
Baccalaureate'ka Caalamiga ah
Derejo aqoodneedyaa Shaqada la xiriiro
Tababarrada Sare
Dibloomooyinka Sare
Dibloomooyinka Horuumarsan

Heerarka 4-8

Dibloomooyinka Sare ee Qaranka
Digriiga Asaasiga ah
Shahaadada Sare ee Qaranka
Digriiga Honours'ka ah

Shaqo

Taageeridda waxbarashada iyo horuumarka

Helitaanta derejada aqoontu waa muhiim, laakiin waxbarashaduna waa horuumarinta shaqsiga iyo door muhiim ah ka ciyaaridda bulshada dhexdeeda. Waalid ama daryeele ahaan waxaad ka caawin kartaa ilmahaaga in uu aad u madax banaanaado uuna diyaar u noqdo mid dhex mushaaxo dunida.

Ardayda xarfaanta ah
Laga bilaabo Sanadka 9'aad, iyo sii waditaanka Sanadaha 10 iyo 11, ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa in:

- uu isku dubarido waxbarashadiisa
- uu ka soo baxo waqtiga loo qabto projects'yada iyo shaqada koorsada
- uu isticmaalo cilmi-baarista macluumaad kala duwan
- uu caqliyan wax u muraajaceeyo.

Waxaad ku caawin kartaa in ay noqdaan kuwo si waxtar leh wax u barto haddii aad ogtahay sida ugu wanaagsan ee ay wax u bartaan.

Ma garaneysaa qaabka uu ilmahaagu wax u barto?
Weligaa mala yaabtay sababta ay ilmahaagu u doonayaan in ay dhegeystaan miyuusikada, erayadana cod dheer ugu sheegaan ama u istaagaan oo u warwareegaan marka ay wax baranayaan? Waxaa laga yaabaa in ay la xiriirto qaabkooda waxbarasho.

Waxaanu isticmaalnaa dareemayaasheena gaarka ah – maqalka, aragga iyo taabashada – si ay inooga caawiyaan in aan barano walxaha. Qaar inaga mid ayaa doorbido in ay isticmaalaan hal dareeme in badan marka loo eego kuwa kale. Tani waxay saameyneysaa hababka kala duwan ee aan jecelnahay in aan wax u barano.

Muraajacooyin iyo xirfadaha imtixaanada uu baran doono ilmahaagu dhowrka sano ee soo socoto ayaa la jaanqaadeyso qaababkan waxbarasho. Khariiradaha maskaxda, liisyada,acronyms'ka, isku xirka erayada iyo rhymes'ku waxay u baahan yihiin qabab kala duwan. Ku dhiirigeli ilmahaaga in uu isku dayo dhowr hab oo kala duwan si ay uga caawiso in uu wax u barto si waxtar leh.

Ardayda jecel in ay maskaxiyan wax u sawiraan…	**Haddii ay jecel yihiin in ay maskaxda wax ka sawirtaan, ku dhiirigeli in ay…**
• waxay sameeyaan qoraalo faahfaahsan badanaana indhahooda way xiraan si ay wax u xasuustaan • waxay jecel yihiin tusaalooyinka iyo soo bandhigista midabada loo isticmaaly • waxay raadsadaan wax daawadaan marka ay caajisaan.	• isticmaalaan walxaha aragga marka ay waxbaranayaan, sida sawirada, shaxda, khariidadaha, garaafyada, iwm • isticmaalaan midabada si ay u calaamadiyaan baraha muhiimka ah • qoraallo sameystaan ama isticmaalaan waraaqaha daabacan oo ay muuqaal ahaan u isticmaal macluumaadka sida sawir ama khariirad maskaxeed • usoo gudbiyaan figradahooda sawir ahaan ka hor inta aysan qorin • wax ku bartaan meel degan oo buuqa ka fog.

Ardayda jecel in ay wax dhegeystaan… • waxay wax ku bartaan kor u akhrinta ama ka hadalka casharada • hoos ayay u hadlaan ama naftooda ayay la hadlaan ama dadka kale marka ay caajisaan • waxay ku wanaagsan karaan wax sharaxaadda ama raacitaanka amarada hadalka ah.	**Haddii ay jecel yihiin in wax dhegeystaan, ku dhiiri geli in ay...** • ku biiraan fasalada falanqeynta iyo doodaha • wax qortaan kuna soo ceshadaan • qoraalada kor u akhriyaan • sameeyaan dhawaqa miyuusikada ama isticmaalaan erayo isku xirid is ay uga caawiso in wax xasuustaan • falanqeeyaan figradahooda • ku soo celiyaan wixii dhacay indhahooda oo xiran.
Ardayda jecel ficil ama taabasho… • waxay sida ugu wanaagsan wax ugu bartaan waxyaalaha gacanta laga qabto, sida karinta, injineernimada ama art'ga • waxay u baahan yihiin in ay firfircoonaadaan biririfna qaataan • waxay jecel yihiin in ay wax ku ciyaaraan ama ay wax uun sameynayaan marka ay waxbaranayaan.	**Haddii ay jecel yihiin ficilka ama taabashada, ku dhiiri geli in ay…** • waxbarashada ka qaataan biririf joogto ah oo ay socsocdaan si ay u bartaan waxyaalo cusub • isticmaalaan ficilada ama ka qaybqaadasho si ay wax u bartaan • isticmaalaan midabada iftiimaya si ay ugu caalamadiyaan waxyaalaha akhriyo • dhegeystaan miyuusig in ay waxbaranayaan • wax la bartaan arday kale.

Shakhsiyaadka kalsoonida qabo
Garashada guusha iyo calaamadinta guulaha cusub ayaa dhisto kalsoonida qof kata, ma aha ilmahaaga oo kali ah.

Sanadaha 10'aad iyo 11'aad, ilmahaagu wuxuu la kulmi doonaa khibrado cusub oo badan, tusaale ahaan barashada maaddooyin cusub, u safridda meelo badan mara laga reebo dugsiga si uu wax u barto, khibrad shaqo iyo howlaha tababarrada. Haddii aad ka caawin karto in ay guul ka muujiyaan khibradahan waxay kor u qaadi doontaa kartidooda shaqsiyeed.

Isticmaal falanqeynta aad ka yeelaneyso kala doorashada si aad iyaga u caawiso:

- soo saar ujeedooyinka iyo himmadaha
- ka fikir dhammaan waxyaalaha ay sida wanaagsan u sameeyaan
- uga mahadceli wixii wanaagsan ee ay ku sameeyaan dugsiga gudihiisa iyo dibaddiisa.

Khibrad shaqo
Khibradda shaqo siinta waxaa inta badan la diyaariyaa Sanadka 10'aad iyo 11'aad wuxuuna ku dhammaadaa hal ama labo todobaad. Arimahan inta badan waxaa isku dubarido hay'ado dibadda ka imaanayo, laakiin waxay siiyaan dhalinyarada dhadhanka nolosha shaqada. Inta lagu jiro khibradda shaqo, ardaydu waxay si hoose ula shaqeeyaan shaqaalaha ku jiro shaqada dhabta ah. Waxay u tahay fursad ay ku bartaan xirfado cusub, kuna helaan shirkado cusub iyo shaqooyin gaar ah, sidoo kalana ay ku fahmaan waxa uu loo shaqeeyuhu rejeynayo.

Dhalinyarada qaarkood waxaa ku adag in ay naftooda u diyaariyaan meel cusub kuna yimaadaan waqtigii loogu talo galay, dad in ay la shaqeeyaan lana qabsadaan xiliyo iyo nawaaxi aan caadi aheyn. Haseyeeshee, laakiin khibradda shaqo ee lagu guuleysto ayaa waxay wax badan ka tari kartaa dhiiri gelinta isku kalsoonaanta.

Shaqeynta hal gelin
Helitaanka shaqo hal gelin ah ma siineyso madax bannaani dhaqaale oo kali ah, laakiin waxaa kale oo ay siisaa fursad ay dad kale kula kulmaan, kalsoonidooda ku dhisaan carbisna ku qaataan iyagoo isticmaalayo xirfadahooda.

Waxaa jiro sharciyo iyo xanibaadaha degaanka oo la xiriiro nooca shaqo ee ay dhalinyaradu qaban karaan, iyo saacaadaha iyo maalmaha loo ogol yahay in ay shaqeeyaan ka dhammaadka Sanadka 11'aad. Si aad u ogaato in badan, booqo **www.connexions-direct.com** ama la xiriir xarunta Connexions ee degaankaaga.

Barnaamijyada tababarka
Inta lagu jiro Sanadaha 10'aad iyo 11'aad ilmahaaga waxaa la siin doonaa fursad ay uga qaybqaadanayaan howlaha tababarka. Arintan waxaa laga yaabaa in la diyaariyo iyadoo maalin gaar ah ka ah dugsiga ama fursad ay kula biirayaan qorshaha tababarrada da'yarta ama barartan kooxeed. Howlaha tababarka waxaa lagu bartaa xirfado dhaxalgal ah sida koox ahaan u shaqeynta, xallinta dhibaatooyinka, wada xiriirka, barashada wajahaadda halista iyo muhandasnimo u fikirka. Waxaa qiimeeyo machadyada, jaamacadaha iyo loo shaqeeyayaaha mustaqbalka.

Muwaadiniinta mas'uulka ah
Ka caawi ilmahaaga in uu ogaado sida ay qiimo u leedahay in uu doorar muhiim ah ka ciyaaro dugsiga gudihiisa iyo dibaddiisa. Mas'uuliyaduhu waxay siinayaan fursad ay ku soo bandhigaan xirfadahooda sida isku dubaridka, koox ahaan u shaqeynta iyo kalsoonida. Boosaskani waxaa kale oo ay siiyaan caddeymo wanaagsan marka ay bilaabaan in ay ka fikiraan CV'ga marka ay codsanayaan machad ama jaamacad, ama shaqo. Inta ay dugsiga dhignayaan, waxaa dhici karto in ay helaan fursad ay wax ku caawin karaan iyagoo ka qaybqaadanayo sida xubnaha guddiga dugsiga, kabtanka kooxda isboortiga ama isku duwaha jariidadda dugsiga.

Mutadawacnimo
Dhalinyaro badan ayaa ogaaday in mutadawacnimadu tahay hab weyn oo lagula kulmo dad cusub, xirfado cusub lagu barto laguna ballaariyo aragtidooda. Waxay noqon kartaa ballanqaad joogto ah ama howlo mid mid ah. Waxay ka caawin kartaa ilmahaaga dhisitaanka kalsoonida waxaa kale oo ay siisaa caddeyn wanaagsan oo ku aadan guulahooda CV'ga.

Wixii figrado ah oo ku saabsan halka laga helo fursadaha gaar ahaan kuwa ku haboon dhalinyarada nawaaxigaaga ama meelaha kael, booqo **www.connexions-direct.com**

Caqabadaha
Ku dhiiri geli ilmahaaga in ay ula tacaalaan caqabado shaqsiyeedka, gooni ahaan ama iyagoo saaxiibadood kaashanayo, iyagoo fursadaha ka helayo degaanka ama dugsiga. Tan waxaa ka mid noqon karo helitaanka dooq cusub ama waxyaalo la xiiseeyo,ku biiritaanka ururro ama kooxo, ama ku biiritaanka qorshe abaalmarineed, sida Qorshaha Abaalmarinta Duke'ga Edinburgh (Duke of Edinburgh's Award Scheme). Waxay ka bilaabin karaan Abaalmarinta Bronze'ga (Bronze Award) marka ay jiraan 14. Dugsiga badan ayaa hadda leh qorshahan, laakiin si aad u ogaato in badan, booqo **www.theaward.org**

Arrin Daraaseyn: Anthony
Anthony wuxuu dhigtaa Sanadka 10'aad wuxuuna doonayaan in ganacsi u gaara sameeyo. Isagoo arintan maskaxda ku hayo, wuxuu go'aansaday in uu qaato fusadaha dugsigiisa ka jiro si uu uga qaybqaato qaar ka mid ah howlaha gancsiga dhalinyarada.

Wuxuu ka qaybqaatay 'money wise', taas oo aheyd maalin howlo badan la qabanaya iyadoo diiradda la saarayo sida loo maareeyo lacagtaada. Waxaa kale oo uu ka qaybqaadanay qorshe waqti dheer soconayo oo lagu magacaabo e-mentors taas oo uu ka helayo talo iyo howlaha hadda socdo oo uu ka helayo ganacsatada degaaka.

'Dhab ahaantii aad ayaan ugu raaxeystay howlaha ganacsiga dhalinyarada, gaar ahaan wax soo bandhigista halkaas oo aan ku muujin karayay dhammaan shaqadeyda adag. Waxaan bartay sida si wacan loogu shaqeeyo doorarka kala duwan iyo koox ka tirsanaanta. Waxaa kale oo aan bartay in ka jawaabista baahida macaabiisha ay muhiim u tahay ganacsiga wanaagsan.'

Anthony wuxuu ku biiray howlaha ganacsiga ee gacanta laga qabto, taas oo ka caawisay in uu barto xirfadaha ay loo shaqeeyayaashu raadinayaan muhiimkana u noqon doono nolol maalmeedka. Waxaa kale oo uu helay caddeymo uu ku soo bandhigi karo xirfadihiisa iyo aqoontiisa, taas oo uu u isticmaali karo in ay taageeto Dibloomadiisa BTEC ee ugu horeyso, taas oo uu la baranayo GCSE giisa.

Anthony waalidkiis way ku taageereen ka qaybqaadashada dhacdooyinka ganacsiga dhalinyarada: *'Waxay dareemeen in ay ii tahay fursad wey, bacdamaa aan ka helay khibradda xirfadaha mustaqbalka waana ku raaxeystay sameynta howlaha gacanta laga qabto.'*

Kala doorashda Sanadka 11'aad

Ka dib marka la kala doorto waxyaalaha la kala doorto Sanadka 9'aad, Sanadka 11'aad ayaa go'aanka xigo ee ugu muhiimsan ee ilmahaaga. Derejo aqooneedyada kala duwan iyo meelaha wax laga barto si weyn ayay u sii ballaaranayaan, laakiin dariiq kasta oo ay doortaan ku dhiiri geli ilmahaaga in sii wataan waxbarasho waqi buuxo ah. Derejo aqooneedyada wanaagsan waxay kordhiyaan rejada shaqada, dakhli wanaagsan iyo ku qanacsanaanta shaqada oo sareyso, shaqooyinka dadka aan derejo aqooneedyada laheyna way sii baaba'ayaan.

Guud ahaan, doorashada waa in ay:

- tahay mid waxbarasho waqti buuxo ah oo ka sii soconeyso dugsi ama machad
- tahay waxbarasho sii soconeyso laakiin isla markaasna uu wehliyo tababar iyadoo la raacayo barnaamijka tababarka
- shaqo ku bilaabaan, iyagoo la wadayo doorasho shaqo hal gelin ah.

Waxbarashada waqtiga buuxo ah
Haddii ilmahaagu doonayo waxbarasho waqti buuxo ah, waxaa muhiim ah in meelaha la eeg eego si loo tixgeliyo dhammaan kala doorashooyinka la heli akro.

Ha tageen maalmahaa furan ee loo dhan yahay ee dugsiyada iyo machadyada haddii ay suurtagal tahay la kulan macalimiinta laga yaabo in ay waxbari doonaan ilmahaaga. Dugsiyada waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin galbaha macluumaadka oo loogu talo galay waalidiinta/daryeelayaasha iyo ardayda, ilmahaaguna wuxuu heli karaa fursad uu ku xaadiro xisooyin tijaabo ah oo laga bixinayo machad maxalli ah.

- Waydii ilmahaaga wixii soo jiitay labadii sano ee lasoo dhaafay ka dibna eeg koorsooyinka iyo derejo aqooneedyada la heli karo ee meelahaas la xiriiro.
- Eeg dugsiyo iyo machadyo kala duwan iyo sida jewiyada ay wax ku dhigaan. Ka fikir haddii habka ay wax u dhigaan uu ku haboon yahay ilmahaaga.
- Ogow waxyaalaha la heli karo sida clubs'ka iyo fursadaha dheeraadka ee manhajka.
- Hubi isku xirka gaadiidka haddii dugsiga ama machadka uu ilmahaagu ku fikirayo uusan aad ugu dhaweyn halka aad ku nooshahay.

Xusuusnow in ilmahaagu codsan karo dugsiyo iyo machadyo fara badan. Waqtiyada ugu dambeeya codsiyada intooda badan waa xiliga guga iyo xagaaga Sanadka 11'aad. Waxaa si dhif ah u dhacdo in waqtiyada kama dambeysta ah ay soo degdegaan sidaas darteed arintan ka hubi barta internerka machadka/dugsiga ama la taliyaha gaarka ah ee ilmahaaga ee Connexions.

Meelaha wax laga barto
- Waxbarashada dheeraadka ah iyo machadyo gaar ah – Kuwani waxay carbiyaan arday fara badan waxayna badanaa bixiyaan koorsooyin la kala dooran karo oo badan iyo derejo aqooneedyo. Machadyada gaar ayaa laga yaabaa in ay ku takhasusaan maaddooyin gaar ah, tusaale ahaan arts'ka muhandasaadda ama waxbarasho dhulka ku saleysan.
- Dugsiga foomka lixaad – Xattaa haddii dugsiga uu hadda ilmahaagu dhigto leeyahay foomka lixaad, waxay u bedelan karaan dugsi kale. Dugsiyada kala duwani way ku kala duwan yihiin koorsooyinka AS iyo heerarka A ee ay ku bixiyaan foomka lixaad. Qaar ayaa u ogolaado in ardaygu dib u qaato GCSE ka weyn.
- Dugsiyada foomka lixaad – Kuwani waxay badanaa bixiyaan AS ama Heerarka A oo ballaaran, derejo aqooneedyada shaqada la xiriiro ama dib u qaadashada GCSE ka weyn. Waxay badanaa ardayda ka qataan dugsiyada nawaaxiga oo kala duwan.

Derejooyinka aqoonta
AS iyo Heerarka A

- Heerarka A waa koorsooyin labo sano ah oo laga sameeyay Heerka AS iyo A2, iyadoo qayb kasta ay tahay 50% ee celceliska derejooyika guud.
- Ardayda intooda badan waxay ku qaataan seddax ama afar Heerarka AS ah sanadka koowaad ka dibna waxay doortaa in ku sii wataan seddax A2 yada ah sanadka labaad si ay uga dhigaan Heerarka A oo dhameystiran.
- Heerarka A waxaa loo kala qaadaa qaybo qayb kastana waxaa loogu qiimeeyaa goonideeda hab isku dhaf ah oo ah qiimeynta maxalliga ah iyo imtixaano. Maaddo kasta waxay leedahay afar qaybood.
- Waxaa jiro qiyaas ahaa 80 maaddo oo wax laga xulankaro, oo ay ku jiraan qaar diiradda la saarayo waxyaalaha shaqada la xiriiro. Kuwan waxaa loo yaqaan Heerarka A ee Applied'ka ah waxaana lagu heli karaa abaalmarino kali ah ama lamaan – tan dambe waxay u dhigantaa labo Heerarka A ah.
- Waxaa jirto derejada A* oo cusub oo loogu talo galay ardayda ugu derejada sareeyo.
- Derejadan aqoonta ee ah mashruuca horuumarsan waxaa dooran karo haddey doonaan kuwa dhiganayo Heerarka A waxaana loo diyaariyay si ay ardayda uga caawiso sidii ay u horuumarin lahaayeen xirfadahooda ee looga baahan yahay koorsooyinka waxbarashada sare.

Baccalaureate'ka Caalamiga ah
International Baccalaureate Diploma (IB) waxay u aqoonsan yihiin derejada aqoonta bilowga ah jaamacadaha dunida oo dhan. Waxay qaadataa labo sano ardayduna waxay bartaan lix maaddo oo laga soo xulay maaddooyin kala duwan, caadiyan seddax laga soo xulay heerka sare iyo seddax laga soo xulay heerka caadiga ah. Waxaa iyana jiro seddax arimood oo qasab ah – curis cilmi-baaris ah oo markii ugu horeysay ah, theory'ga aqoonta, iyo hal abuurnimada, actions'ka iyo mashruucyo adeeg.

Dibloomada
Bacdamaa ay Dibloomadu tahay derejo aqooneed cusub, weli lagama heli karo meelkasta. Hubi haddii laga heli karo dugsiga uu ilmahaagu dhigto. Haddii ilmahaagu hore usii waday waddada lagu gaarayo waxbarashada Asaasiga ama Dibloomada Sare ee lagu dhigto dusiga, marka tan la dhameeyo ka dib, waxaad usii gudbi kartaa Dibloomada heerka xigo (Sare ama Horuumarsan) ama uu doorto derejo aqooneed kale sida Heerarka A ama Tababar Sare.

Wixii warar dheeraada ah oo ku saabsan Dibloomooyinka ka eeg Kala doorashada Sanadka 9'aad **bogagga 7-10**.

Derejo aqooneed waqti buuxo ah lana xiriirto goobta shaqada
Waxa jiro derejooyinka aqoonta oo kala duwan oo heerar kala duwan ah kuwaas oo la xiriiro shaqooyin gaar ah ama qaybaha shaqooyinka ee waaweyn. Haddii ilmahaagu ay mehnad maskaxda ku hayaan waxaa laga yaabaa in ay doonayaan in ay tixgeliyaan derejooyinka aqoonta sida BTEC Dibloomada Koowaad iyo NVQ ee heerka 1'aad ilaa 3'aad. Qaarkood waxaa lagu bixiyaa foomka lixaad ee dugsiga, laakiin inta kale waxaa laga heli karaa machadyada waxbarashada dheeraadka ah.

Tababarrada
Tababarrada waxaa laga helaa waxyaalo la taaban karo oo isku dheeli tiran oo u dhexeeyo waxbarashada iyo ganacsiga iyo helitaanka dakhli lagu noolaado haddana waxaa jiro in ka badan 180 tababar oo kala duwan oo la heli karo. La taliyaha ilmahaaga ee gaarka ah ee Connexions ayaa go'aan ka gaari karo qaybta shaqo heerka ugu haboon.

Dhammaan tababarradu waxay kuu horseedayaan Xirfadaha Derejooyinka aqoonta Qaranka. Qaar tababarrada ka mid ah ayaa xattaa lagu bixiyaa shahaadooyinka BTEC ama City & Guilds. Mushaarku wuu kala duwanaan karaa, laakiin dhammaan kuwa tababarka soo qaatay waa in ay helaan ugu yaraan £80 todobaadkii.

Tababarku waxaa kale oo uu xattaa kuu horseedi karaa waxbarashada sare si aad ugu hesho derejooyin aqoon dheeraad ah. Si aad u ogaato in badan, booqo **www.apprenticeships.org.uk**

Shaqo bilaabidda
Haddii ilmahaagu ku fikirayo in uu toos u bilaabo shaqao, ku dheeri geli in uu helo mid leh tababar si ay weli xirfado usii baran karaan una heli karaan derejooyinka aqoonta. Waqtiga fog, tani waxay u keeni doontaa rejo wanaagsan iyo mushaar sare. Talo ka qaado la taliyaha gaarka ah ee ilmahaaga ee Connexions.

Haddii ilmahaagu aanu heysan derejada aqoonta Heerka 2'aad – taas oo ah, GCSE ee derejooyinka A*-C ama NVQ ee Heerka 2'aad ama mid u dhiganta – waxay xaq u leeyihiin in la siiyo Fasax loogu talo galay Waxbarasho iyo Tababar (Time Off for Study and Training) (TfST). Si ay ugu qalmaan, waa in da'doodu tahay 16-17 oo ayna shaqeynayaan. Si aad u ogaato in badan booqo xaruntaada maxalliga ah ee Connexions ama **www.connexions-direct.com**

Haddii ay heystaan derejada aqoonta Heerka 2'aad, weli waxay dantoodu ku jirtaa in ay raadsadaan shaqo tababar leh.

Haddii ilmahaagu ku fikirayo in uu bilaabo ganacsigiisa u gaarka ah, waa in ay weli sii qorsheystaan in a sameeyaan tababar dheeraad ah si ay u horuumariyaan xirfadahooda. Waxaa taageero laga helayaa Isku xirka Ganacsiga halkan 0845 600 9006 ama **www.businesslink.gov.uk** iyo Hay'adda samafalka The Prince halkan 0800 842 842 ama **www.princes-trust.org.uk**

Kuwa aan diyaarka u aheyn in ay toos u qaataan kala doorashooyinka sare?
Shaqo Bilaabidda (e2e)
Kani waa barnaamij shaqo loogu diyaar garoobayo kaas oo caawinayo kuwa da'doodu tahay 16-18 in ay usii gudbaan waxbarasho kale, tababar ama shaqo. Haddii ilmahaagu taageero ugu baahan yahay wax qoristooda, xisaabaadka ama xirfadaha IT'ga, e2e ayaa siineyso fursad ay ku helayaan derejooyinka aqoonta ee xirfadahan iyo fursad ay isugu deyayaan shaqooyin nooc kale ah.

Wixii warar dheeraada ah oo ku saabsan taageerada maaliyadeed, ka eeg taageerada maaliyadeed ee 16'ka ka dib **bogagga 26-28**.

Waxaa dhici karto in ilmahaagu xaq u leeyahay in uu helo Gunnada Dhowrista Waxbarashada (EMA) inta uu barnaamijka ku jiro waxaana dhici karto in uu helo caawimaad la xiriirto kharashka safarka.

Arrin Daraaseyn: David
David wuxuu dhigtaa Sanadka 11'aad wuxuuna qaataa GCSE giisa. Wuxuu hore maskaxda ugu hayay figrad mehnad ku saabsan wuxuuna doonayaa in uu sii wado waxa uu xiiseynayo ee ah sharciga ka dib marka uu dugsiga dhameeyo. Isagoo arintan maskaxda ku hayo, David wuxuu eegay maaddooyinka uu u baahan doono in uu sameeyo Sanadka 11'aad ka dib si uu awood ugu yeesho in uu ka sii wado barashada sharciga jaamacadda.

'Waxaan sameeyay waxooga cilmi-baaris ah waxaana ogaado in jaamacadaha sharciyadu ay caadiyan raadinayaan dad bixin karo Heerarka A oo isku dhaf ah umana baahnid in aad sharci ku baratay Heerka A. Waxaan ogaaday in jaamacaduhu badanaa raadiyaan dadka derejadoodu Heerka A ay sareyso, sidaas darteed waxaan doortay in aan barto maaddooyinka aan ogahay in aan ku wanaagsanahay.'

David taladiisu waxaa weeye in haddii aad ogtahay mehnadda aad dooneyso in aad doorato in ay tahay figrad wanaagsan aad marka hore sameyso waxoogaa cilmi-baaris ah si aad u hubiso maaddooyinka laga yabaa in ay faa'iido kuu leeyihiin ama dabcan la isaga baahan yahay. Haddii aadan ogeyn waxa aad dooneyso in aad sameyso, markaas qaadashada maaddooyin kala duwan oo ballaaran ayaa ka dhigi karo kala doorashooyinkaaga kuwo furan.

'Waxaan go'aansaday in aan qaato inta badan maaddooyinka waxbarashada ee foomka lixaad waxaana doortay xisaab, Ingiriis iyo taariikh. Laakiin waxaa kale oo aan doonayay waxoogaa kala duwanaansho ah, sidaas darteed waxaa kale oo aan doortay masraxiyadda, taas oo aan ku raaxeysto.'

Taageerada maaliyadeed 16’ka ka dib

Ma dooneysaa in aad ku dhiiri geliso ilmahaagu wax sii barto laakiin adigu maka welwelsan tahay kharashka? Hadduu ilmahaagu dhigto dugsi ama machad, waxaa jiro dhowr hab oo lagu helo taageero maaliyadeed.

Gunnada Dhowrista Waxbarashada (EMA)
EMA waa lacag tobaadkiiba mar la qaato oo gaareyso ilaa £10, £20 ama £30 todobaadkii (iyadoo ku xiran dakhliga qoyskaaga) taas oo toos loogu dirayo koontada bangiga ilmahaaga. Laga bilaabo 2008-09 EMA waxay u Ballan qaadeysaa ardayga in uu xaq u yeelan doono EMA isla caddadka lacagtaas muddo gaareyso seddax sano, inta ay ka soo baxayaan waxyaalaha la isaga baahan yahay ee ku dhigan heshiiskooda waxbarashada.

Ilmahaagu wuxuu lacagta kaashka ah u isticmaali karaa si ay uga caawiso kharash maalmeedka waxbarashada, sida buugaagta iyo qalabka. Waxaa iyana jirto lacag ka sareyso lacagta todobaadlaha ah oo gunno ah oo heli karaan – laakiin waa haddii ay sii wadaan oo kali ah in ay ka soo baxaan bartilmaameedka uu u dejiyay macalinkooda, tababaraha ama bixiyaha markii ay bilaabeen.

EMA ma saameyneyso manfacyada kale ee guriga, sidaas darteed waxaad weli sii awoodi doontaa in aad dalbato waxyaalaha ah sida Manfaca Ilmaha iyo Credit’ka Canshuurta Ilmaha. Ilmahaagu waxay weli sii dalban karaa EMA haddii ay qabtaan shaqo hal gelin ah.

Waxaa dhici karto in ilmahaagu awoodo in uu helo EMA Sanadka 11’aad ka dib haddii:

- ay da’doodu tahay 16-18
- ay yihiin:
  kuwo ka dhigto waxbarasho waxqti buuxo ah dugsi ama machad
  ama barnaamijka e2e (eeg qoraalka hose)
  ama ay ku jiraan koorso u horseedeyso Tababar (oo loo yaqaan Barnaamijka Tababarka Horseedayo)
- dakhliga sanadlaha ah ee qoyskaagu ka hooseeyo barta bilowga (codsiyada 2008-09, waa in uu ka yaraadaa £30,810 sanadka canshuurta 2007-08).

Dugsiga ilmahaagu waa in uu qaybiyaa macluumaadka EMA marka ugu dambeyso teeeramka xagaaga ee Sanadka 11’aad. La taliyaha gaarka ah ee Connexions ka talo ka siin karo sida loo dhameystiro foomka codsiga ama wixii dokumeenti ah ama caddeyn ah ee lagaaaga baahan yahay in aad keento. Wixii warar dheeraada ah oo la xiriiro EMA iyo sida loo codsado, booqo **www.direct.gov.uk/ema** ama ka wac Aadka Caawin Ardayda halkan 0800 121 8989.

Isku habeynta e2e ga cusub
Laga bilaabo 30 Juun 2008, dhammaan dhalinyarada qaadaneyso koorsooyinka LSC ee ay maalgeliso e2e waxay xaq u yeelan doonaan in ay helaan lacagta todobaadlaha ee EMA ee ugu badan iyadoo aan tixgelineyn dakhliga qoyskooda (iyadoo ku xiran in ay u qalmaan marka loo eego da’dooda iyo degaankooda). Wixii warar dheeraada ah booqo **www.connexions-direct.com** ka dibna xulo ‘Shaqo’, ka dibna ‘Qorshayaasha Shaqo’.

Taageerada Maaliyadeed ee Kala doorashada
Taageerada maaliyadeed waxaa loo isticmaali karaa in lagu caawiyo ardayda da'doodu tahay 16 iyo ka weyn kharashaadkooda la xiriiro waxbarashada dheeraadka ah. Waxaa loogu talo galay kuwa qabo baahida ugu daran waxaana laga heli karaa iyadoo lala xiriirayo Sarkaalka Taageerada Ardayga ee joogo machadka foomka lixaad ee dugsiga ee uu ilmahaagu dhigto. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka guud Taageerada Maaliyadeed ee Kala doorashada (Discretionary Support Funds) halkan **www.direct.gov.uk**

Kharashka gaadiidka
Caawimaad la xiriirto kharashka gaadiidka way kala duwan tahay marka loo eego Maamullada Deegaanada kala duwan. Wixii warar dheeraada ah booqo **www.direct.gov.uk/extrahelp**

Abaalmarinada Masraxiyadda iyo Qoob ka ciyaarka
Abaalmarinada Qoob ka ciyaarka iyo Masraxiyadda waxay gacan ka geystaan bixinta lacagta tababarka kharashka nolosha ee qaar ka mid ah kuwa bixiyo tababarrada qoob ka ciyaarka iyo masraxiyaddda ee gaarka loo leeyahay gudaha England. Tirada abaalmarinadu waa xadidan yihiin dalabkooduna waa sareeyaa. Lacagta la bixiyo way kal duwan tahay, iyadoo qayb ahaan ku xiran xaaladda qoyska. Wixii warar dheeraada ah booqo **www.direct.gov.uk/danceanddrama**

Ilaha kale
Qaar ka mid ah ururada qaranka iyo kuwa maxalliga ah, oo ay ku jiraan samafalayaaha iyo trusts'ka, waxay siiyaan lacag ardayda barato maaddooyin gaar ah ama qabo cuuryaannimo gaar ah. Meelaha ugu wanaagsan ee laga bilaabo helitaanka ururadan waxaa ka mid ah Xirfad: Xafiiska Qaranka ee Ardayda Cuuryaamiinta ah (Skill: National Bureau for Students with Disabilities) halkan **www.skill.org.uk** iyo barta internetka Adeegga ka Talo bixinta Lacagaha Waxbarashada **www.egas-online.org.uk**
Maktabadda Shacabka ee degaanka ayaa laga yaabaa in laga helo macluumaad.

Caawimaad loogu talo galay xirfad shaqo bartayaasha iyo tababar qaatayaasha
Tababar qaataha aan lacaga qaaadan ee dhigto koorsooyinka horseedayo Barnaamijka kuu Horseedayo Tababarka waxay dalban karaan EMA. Iyadoo ku xiran nooca tababarka, xirfadda shaqo ee ay baranayaan waxaa dhici karto in helaan lacag yar oo looga caawinayo safarka iyo kharashka daryeelka carruurta. Waxaa kale oo laga yaabaa in xaq u yeeshaan waxoogaa manfacyo ah haddii dakhligoodu hooseeyo ama ay leeyihiin carruur ay daryeelaan. Wixii warar dheeraada ah, kala xiriir qadka caawinta tababarka halkan 08000 150 600 ama booqo **www.apprenticeships.org.uk**

Caawimaad loogu talo galay waalidiinta da'da yar
Haddii ilmahaagu ka yaryahay 20 uuna yahay waalid da'yar oo uu daryeelo ilmihiisa gaarka ah ama carruur, waxay heli karaan Daryeel Waxbarasho. Lacagtan waxaa loogu talo galay in ay ka caawiso bixinta daryeelka carruurta ka diiwaan gashan bixiyaha daryeelka carruurta, si qofka da'da yari ula socon karo koorsooyinka dugsiga, machadka, ee lagu qaato barnaamijka horseedayo tababarka ama e2e. Wixii warar dheeraada ah la hdal la taliyaha gaarka ah ee Connexions ama booqo **www.direct.gov.uk/caretolearn**

Caawimaad loogu talo galay dhalinyarada cuuryaamiinta ah ama ay waxbarashadu ku adag tahay
Machadyadu waxay badanaa leeyihiin dhaqaale loogu talo galay in ay ku hubiyaan daboolidda baahida ilmahaaga cuuryaanka ah, tusaale ahaan , iyagoo siinayo qalab khaas ah ama taageero dheeraad ah. Maamullada Degaanku waa in ay hubiyaan n aan ardaydi aadi waayin machadka iyadoo ay sabab u tahay dhibaato xagga gaadiidka ah, sidaas darteed waxay badanaa siiyaan taageero xagga gaadiidka ah ardayda cuuryaamiinta ah. Machadka xattaa waxaa dhici karto in uu bixiyo kharashka safarka.

Waxaa dhici karto in ilmahaag boos ka helo machad madax bannaan ama takhasus bixiyo haddii baahidooda cuuryaannimo aysan dabooli karin dugsiga maxalliga ah iyo machadka.

Haddii ilmahaagu shaqo helo ama uu shaqo bilaabi rabo, Qorshaha Shaqo Helista ayaa ka caawin karo kharashka dheeraadka ah ee ay galaan iyadoo ay sabab u tahay cuuryaanimadooda sida shaqo aaditaanka iyo ka imaanshaha, saacidaad gaar ah iyo qalab, iyo qalabka cuuryaamiinta ee goobta. Wixii warar dheeraada ah, booqo **www.jobcentreplus.gov.uk**

La taliyaha ilmahaaga ee gaarka ah ee Connexions ayaa kaa caawin karo helitaanka lacagta taageerada ee dheeraadka ah ee ay heli karaan Sanadka 11'aad ka dib.

Taageero Maaliyadeed oo loogu talo galay Dhalinyarada
Buugyarahan muhiimka ah wuxuu soo koobayaa taageerada maaliyadeed ee ay heli akraan 16–19 sano jirrada iyo meelaha laga helo macluumaad dheeraad ah. Waxaad nuqul ka soo guurin kartaa **www.direct.gov.uk/moneytolearn** ama barta internetka Learning and Skills Council (LSC) ee ah **www.lsc.gov.uk** ama waxaad muqul bilaash ah ka dalban kartaa qadka caawinta LSC halkan 0870 900 6800 (adigoo xusayo tixraaca ah LSC-P-NAT-070158).

Arrin Daraaseyn: Thanh
Thanh waxay dhigataa Sanadka 12'aad waxayna ku barataa Heerka A oo ah xisaab, sharci, kimisteri iyo cilmi nafsi foomka lixaad ee dugsigeeda. Si looga caawiyo sii wadista waxbarashadeeda, Thanh waxay codsan kartaa Gunnada Dhowrista Waxbarashada (EMA).

Tani waxay siisaa lacag joogto ah si ay uga caawiso in ay ku bixiso sida buugaagta iyo stationery'ga waxayna u sahashaa in ay xoogga saarto waxbarashadeeda.

'Haddii aanan heli laheyn EMAWaxay ahaan laheyd in aan saacado dheeraad ah shaqeeyo shaqadeyda halka gelin ah, taas oo dhab ahaantii la macno ah in aan heli doono waqti yar oo aan ku qarash gareeyo waxbarashadayda.'

Si ay u hesho EMA, Thanh iyadaa mas'uul ka ah in ay hubiso in ay xaadirto dhammaan casharadeeda waqtigii loogu talo galay macalimiinteeduna saxiixaan si arintan loo hubiyo.

Inkasta oo ay jiraan shuruudo ku xiran helitaanka EMA, Thanh waxay dareemeysaa in ay dhab ahaantii ka faa'iiday. Waxay xattaa dareentay dhiiri gelin badan oo ay ku xaadireyso casharadeeda bacdamaa ay jiraan lacago dheeri ah oo xattaa la heli karo. Wax allaale wixii lacag ah ee ay Thanh ka hesho shaqadeeda halka gelin ah saameyn kuma yeelanayaan EMA keeda.

'Waalidiinteydu way ku faraxsan yihiin helitaanka aan helo EMA xattaa; waxay la macno tahay in ay keydsan karaan dakhliga qoyska bacdamaa aysan iga bixineyn lacagta safarka iyo buugaagta.'

Marka ay dhameyso Heerarka A ka dib, Thanh waxay qorsheyneysaa in ay ku biirto jaamacad. Waxay cilmi-baaris ku sameyn doonto kala doorashooyinkeeda waxayna raadsan doontaa talo dheeraad ah oo ku saabsan wixii taageero maaliyadeed aah ee ay xaq u leedahay waxbarashada sare, sida dib u bixin la'aanta Lacagta Dhowrista.

Kala doorashooyinka 18’ka ka dib

Maxaa loo doortaa waxbarashada sare?
Isbedelada suuqa shaqada iyo baahida shaqaale u qalmo waxay la macno tahay in dad badani ay dooranayaan waxbarashada sare iyadoo ah 18’ka ka dib. Lahaanshaha derejada aqoonta waxbarashada sare waxay albaabka u furtaa fursadaha shaqo, suurtagalnimada shaqo aad u xiiso badan iyo dakhli badan mustaqbalka.

Waxbarashada sare gudaheeda, ilmahaagu wuxuu ku baran doonaa xirfado, iyo qaab waxbarasho ee madaxa bannaan ee laga rejeynayo jaamacadda ayaa bari doono in ay mas’uul noqdaan, in ay waqtigooda maamulaan iyo dhiiri gelinta in ay shaqada ku dhameeyaan waqtigii loogu talo galay – dhammaan xirfadaha dhaxalgalka ah ee nolosha iyo loo shaqeeyayaasha la rejeynayo.

Tusaalooyinka waxbarashada sare waxaa ka mid ah:
Dibloomada iyo Shahaada Qaranka Sare (HNC iyo HND) – kuwani waa derejooyinka aqoonta ee shaqada la xiriiro looguna talo galay in ay dadka leh xirfadaha iyo aqoonta ee looga baahan yahay shaqo gaar ah diyaariyaan. Waxaa kale oo ka mid noqon karo ka mid ahaanshaha hay’adaha xirfadaha iyo ururada loo shaqeeyayaasha. Koorsada HNC waxay qaadataa sanad, HND tuna labo sano waxaana caadiyan lagu xiri karaa sanadka ugu dambeeyo si loo helo digriia Bachelor’ta.

Digriiyada asaasiga ah – Digriiyada asaasiga ah waxay kulmiyaan waxbarashada daruusta iyo waxbarashada shaqada ku saleysan. Koorsooyinka waxaa wada dejiyo jaamacadaha, machadyada iyo loo shaqeeyayaasha, kuwaas oo hubiyo in ardayda dhigato koorsooyinkan ay helaan aqoonta iyo xirfadaha la isaga baahan yahay mehnadaha iyo qaybaha kala duwan. Digriiga Asaasiga ah oo waqtiga buuxo ah waxaa lagu dhameeyaa labo sano wuxuuna u dhigmaa labada sano ee hore ee digriiga Bachelorta. Marka laga qalin jebiyo, ardaydu waxay u bedeli karaan digriigooda digriiga Bachelorta iyagoo ku darayo sanad dheeraad ah.

Digriiyada – Koorsooyinka digriiyada waxaa lagu bixiyaa fahamka maadada oo gundheer, oo ay ku jiraan waxyaalihii ugu dambeeyay ee la daahfuray. Dhammaan digriiyadu waxay kuu horseedayaan horuumarinta xirfadaha laga qiimeeyo goobaha shaqada, sida qiimeynta iyo odorisdda xaqiiqada, xallinta dhibaatooyinka, qoritaanka warbixinada iyo soo bandhigista. Qaar, sida dawooyinka ama sharciga, waxay dadka u diyaariyaan meelo gaar ah oo shaqo.

Koorsooyinka digriiyada waqtiga buuxo ah intooda badan waxay qaataan seddax sano, ama afar haddii ay koorsada ku jiraan halsano oo warshadaha ama dibadda la aadayo. Koorsooyinka maadooyinka qaar, sida sayniska barashada cilmiga xoolaha iyo muhandasnimada, waqti dheer ayay qaataan. Waxaa iyana suurtagal ah in digriiga loo barto si hal gelin ah ama aqoon dersi ahaan.

Codsashada jaamacadda
In jaamacad lagu biiro iyo in kale ayaa noqon karto mid ka mid ah go’aamada ugu muhiimsan ee ilmahaagu qaato, sidaas darteed waxaa wanaagsan in waqti la geliyo ka baaraan degista doorashadan.

Buugga macluumaadka iyo brochures’ka ayaa laga helayaa dugsiyada, machadyada iyo maktabadaha iyo jaamacadaha. Dhammaan machadyada waxay leeyihiin bar internet oo ay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan digriiyada gaarka ee la bixyo, iftiiminta nolosha campus’ka iyo faahfaahinta xiriirka la taliyayaasha. Marka waqtigu soo dhawaado, xaadir maalaha furan, iyadoo aan aheyn si aad u dareento jewiga jaamacadda oo kali ah, laakiin aad ula kulanto shaqaalaha laga yaabo in ay door muhiim ah ka ciyaaraan taageerada

horuumarinta ilmahaaga. Macluumaad dheeraad ah oo loogu talo galay waalidiinta/daryeelayaasha oo ku saabsan jaamacadaha iyo waxbarashada sare waxaa kale oo laga heli karaa barta internetka Adeegyada Ogolaanshaha Jaamacadaha iyo Machadyada (UCAS) **www.ucas.ac.uk/parents** iyo **www.direct.gov.uk/uni**

Kala doorashooyinka kale ee 17'ka iyo 18'ka

Sanadka gap'ka

Dhalinyarada qaar ayaa qaato fasax hal sano ah (sanadka gap'ka) ka hor inta aysan u gudbin marxaladda xigto ee dariiqa mehnaddooda. Jaamacadaha intooda badan waxay arintan u arkaan arin wanaagsan bacdamaa ay siiso dhalinyrada fursad ay ku waynaadaan kuna balaariyaan figraddooda ka hor inta aysan gelin marxaladda xigto ee waxbarashada. Waxaa kale oo ay u wanaagsanaan kartaa CV'ga bacdamaa xirfadaha laga helay sanadka gap'ka ah ee nidaamsan ay aad u rabaan loo shaqeeyayaashu.

Waxaa jiro hay'ado badan oo ka caawin karo da'yartu in ay waqtigooda ka faa'iideystaan, ha ahaato mutadawacnimo, shaqo lacag lagu qaato, ama safarka dunida. Ardayda qorsheynaya in ay sii wataan waxbarashada sare waxay dooran karaan ku biiritaanka dib loo dhigay marka ay ka xulanayaan machadka foomkooda UCAS. Wixii warar dheeraada ah booqo **www.yearoutgroup.org**

Tababarrada

Haddii ilmahaagu doonayaan in ay isaga baxaan waxbarashada waqtia buuxo ah, waxay codsan karaan tababar. Tababarrada waxaa lagu helaa shaqooyin lacag fiican lagu qaato, dhammaan iyaddoo lagu baranayo xirfado laguna helayo derejooyinka aqoonta ee ay loo shaqeeyayaashu doonayaan. Wixii warar dheeraada ah booqo **www.apprenticeships.org.uk**

Helitaan shaqo

Haddii ilmaahaagu doonayaan in ay isaga baxaan waxbarashada waqtiga buuxo ah oo ay shaqo helaan, ku dhiiri geli in ay helaan shaqo leh tababar. Dugsiga ama machadka, ilmahaaga wuxuu ka heli doonaa gacan siin ku aadan sida loo raadiyo shaqada, foomka loo buuxiyo la isuguna diyaariyo kulan wareysiga. La taliyahooda gaarka ah eeConnexions ayaa xattaa heyn doono faahfaahin ku saabsan fursadaha shaqooyinka degaanka oo ay ku jiraan tababarro oo gaar ahaan loogu talo galay dhalinyarada.

Bilaabidda ganacsiga

Tani waa tallaabo aan caadi u aheyn kuwa dugsiyada ka tago. Haseyeeshee, haddii ilmahaagu hayo figrad ganacsi oo wanaagsan, waxaa jiro dhowr urur oo caawin karo. Wixii warar dheeraada ah ah ka eeg **www.connexions-direct.com**, **www.shell-livewire.org** iyo **www.businesslink.gov.uk**

Taageerada maaliyadeed ee waxbarashada sare

Ku taageeridda ilmahaaga waxbarashada sare waxay u baahnaan kartaa lacag, laakiin arintan waa in aad u ragtaa maalgelinta mustaqbalkooda.

Waxaa la helayaa taageero maaliyadeed oo kala duwan oo loogu talo galay ardayda jaamacadda usii gudbeyso. Horuumarinta package'ka maaliyadda ardayga waxay la macno tahay in arday badan oo waqti buuxo wax barto ay xaq u leeyihiin lacag aan dib loo soo celineyn (seddax meelood labo meel dhammaan ardayda cusub, uu u qalanto ayaa ka faa'iidi doono taageerada lacagta aan dib loo celineyn). Wixii warar dheeraada ah booqo **www.direct.gov.uk/studentfinance**

Labo nooc oo taageero ah ayaa la helayaa:

- deynta dib loo soo celiyo ee ardayda
- lacag aan dib loo soo celiney iyo deeq lacageed.

Deynta dib loo soo celiyo ee ardayga
Daymaha ardayga ee loogu talo galay lacagaha Tacliinta – Ardayda ku nool gudaha England ayaa qaadan karo deyntan iyadoo sicirkeeda dulsaarku hooseeyo oo caddad kasto oo gaarayo ilaa lacagta tacliinta oo buuxdo. Deyntu ma aha dakhli la qiimeeyay waxaana toos loogu shubaa jaamacadda ama machadka ee halka uu ardaygu dhigto.

Deynta Ardayga ee KharashkaNolosha (waxaa xattaa loo yaqaan Deynta Dhowrista Ardayga) – Tani waxay dabooleysaa kharashka nolosha ee asaasiga ah waxaana toos loogu diraa koontada bangiga ardayga. Lacagtu waxay ku kala duwan tahay hadba meesha uu ardaygu ku nool yahay. Arday kasto oo UK u dhashay wuxuu xaq u leeyahay 75% oo ah deynta ardayga inta soo hartayna waxaa laga deberayaa dakhliga qoyska.

Dib u bixinta Deymaha Ardayga – Waxay ku xiran tahay ardayga in uu dib u bixiyo Deynta Ardayga marka ay dhameeyaan waxbarashadooda. Deynta Ardayga ee loogu talo galay Kharashka Nolosha iyo Deynta lacagaha Tacliinta labadaba waa laysku daraa dib u bixinta waa sicir ah 9% dakhligaaga ka badan £15,000. Dib u bixinta waxa dib loo bixiyaa oo kalil ah marka ardaygu jaamcadda ka tago oo qaato lacag ka badan £15,000 sanadkii. Sidaas darteed qofkii qaato £18,000 sanadkii waa in uu bixyaa £5.19 todobaadkii.

Caawimaadda aan dib loo bixin
Lacagta Dhowrista – Kuwani waa dakhli la qiimeeyay oo aan dib loo bixineyn. sanadka 2008, lacagaha dhowrista waxay gaarayaan ilaa £2,835.

- Qoyska dakhliguud ka hooseeyo £25,000, ardaydu waxay xaq u yeelan doonaan lacag dhameystiran.
- Qoyska dakhlilgoodu u dhexeeyo £25,001 iyo £60,005, ardaydu waxay xaq u yeelan doonaan lacag hal qayb ah.
- Qoyska dakhliguuda badan yahay £60,005, wax lacag ah lama siinayo.

Deeqaha lacageed ee aan dib loo bixin – Ilmahaagu waxaa kale oo uu ka heli karaa deeq lacageed jaamacadda ama machadka. Waxa saxda ah ee la helayo waxay ku kala duwan yihiin machadyada. Lacagaha deeqda ah dib looma bixiyo waxaana ugu yar £310, laakiin machadyo badan ayaa bixiyo intaa wax ka badan. sanadka 2007-08, ardayda bixiso lacagta tacliinta ee ugu badan helana Lacagta Dhowrista oo buuxdo ee u eg lacagaha deeqda ah waa £1,000. Machadyada waxaa dhici karto in ay bixiyaan deeq waxbarasho iyo damaanad.

Gunnada Ardayda Cuuryaamiinta ah (DSAs) – Kuwan waxaa loogu talo galay ardayda cuuryaamiinta ah, maskaxda looga jiro ama qabo dhibaato waxbarasho oo gaar ah. Caawimaadan ma aha mid la tijaabiyay dibna looma bixiyo. Gunnadu waxay dabooli kartaa caawiyayaasha gaarka ee aan quseyn caafimaadka, walxaha muhiimka ah ee qalabka gaarka ah kharashaadka la xiriiro cuuryaannimada.

Deeqda Daryeelka carruurta, Gunnada Waxbarashada Waalidka iyo Deeqda ku Tiirsanayaasha Dadka waaweyn ardayda ilmaha leh ama qofweyn oo ku tiirsan. Caawimaadda noocan ah qiimeyn dakhli weeye dibna looma bixiyo. Wixii warar dheeraada ah booqo **www.direct.gov.uk/studentfinance**

Helitaanka Deeq Waxbarasho – Tan waxaa laga helaa jaamacadaha iyo machadyada si loo caawiyo ardayda laga yaabo in ay ug baahan yihiin caawimaad maaliyadeed oo dheeraad ah koorsooyinkooda una wataan waxbarashada sare. Lacagahan waxaa badanaa loo bixiyaa deeq ahaan, waxaa kale oo ay noqon karaan deyn dib loo bixiyo.

Arrin Daraaseyn: Bethany
Bethany waxay ka dhigataa Sanadka 12'aad machad waxana barataa Dibloomada Koowaad ee BTEC oo ah Arts'ka iyo Naqshad dejinta. Way ku raaxeysataa koorsada horuumar ayayna ka sameyneysaa. Haseyeeshee, ka dib markii uu ku dhacay Limb-Girdle Muscular Dystrophy sanadkeedii dugsiga ugu dambeeyay, Bethany waxay markii ugu horeysay ka fikirtay in ay machad dhigato.

'Waxaan ka welwelsanaa dhaqdhaqaaqeyga iyo sidii aan u maareyn lahaa la qabsiga machadka. Muhiim yay aheyd in ay fasaladu noqdaan kuwo la geli karo oo aan awoodo in aan isticmaalo wiishka.'

Ka intii aysan bilaabin machadka Bethany waxay codsatay taageero maaliyadeed oo la xiriiro safarka waxaana loo ogolaaday in laga bixiyo tagsiga lagu aadayo loogana imaanayo machadka maalin kasto.

'Waxaan la xiriiri karaa shirkadda tagsiga waqtigana waan bedeli karaa haddii aan u baahdo. Waa kuwo aad isku bedbeli karo oo raacayo baahideyda. Tagsiga wuxuu i dhigaa machadka iriddiisa si aan socod dheer u gelin.'

Bethanyla taliyaheeda gaarka ah ee Connexions ayaa ogeysiiya machadka dhibaatooyinkeeda ka hor intii aysan bilaabin koorsada sidaas darteedna fasalkeeda ayaa la bedelay si loogu ogolaado in ay hesho wiish. Casharada laftirkooda waa la isku habeeyay si ay marar dhif ah isaga gooshto fasalada. Waxaa intaa sii dheer, Bethany waxaa loo ogolaaday in laga bixiyo lacagta qalabka kombiyuutarka.

Caawimaadda ay Bethany heshay waxay ka fududeeyeen wax badan oo ay markii hore ka welwelsaneyd waxayna tani la macno tahay in in aysan machadka ku dhibtoon cuuryaannimadeeda darteed.

Waxyaalaha ay dhalinyaradu ka welwelaan

Mararka qaarkood dhalinyarada waxaa laga yaabaa in uu hayo welwel ku adkeynayo in ay la qabsadaan meelaha kale ee noloshooda. Waxaa laga yaabaa in ay ku caawiso haddii aad dib uga fikirto waqtigii aad dhalinyarada aheyd, wixii aad dareemi jirtay iyo wixii ay arinku ku saabsanaa. Waxaa muhiim ah , si kastaba ha ahaatee, in aad fahamto waxyaalaha caqabadaha ku ah aragtidaada dhalinyaronimo oo aad fahamto waxyaalaha heysto in ay aad uga duwanaan karaan kuwii ku heystay xilligii aad da'dooda aheyd.

Macluumaad, talo iyo taageero ayaa la heli karaa waxayna kaa caawineysaa in aad ka gudubto oo uu kuu sahlanaadaan wadasheekeysiyada adag.

Dugsiyo iyo machadyo badan ayaa hadda leh fasalada macluumaadka waalidiinta/daryeelayaasha kuwaas oo lagula tacaalo qaar ka mid dhibaatooyinka laga yaabo in ay ku heystaan, sida wadahadal la'aanta iyo baylahnimada dareenka. Xisadahan waxaa dhici karto in aan laga heli jawaabaha dhammaan, laakiin wax badan ayaa laga faa'iidaa dhegeysiga sheekooyinka dadka kale iyo wadaagista talooyinka iyo figradaha.

Isku day in aad waqti u hesho la hadalka ilmahaaga oo aad ugala hadasho si aan caadi aheyn waxyaalaha ay ka welwelsan yihiin. Haka baqin in aad xudduud sameyso, laakiin waxaa laga yaabaa in ay sifiican u shaqeeyaan haddii ay ogolaadaan wada xaajood ka dib.

Maanta dhalinyarada waxaa soo wajaho kala doorashooyin aad u badan mararka qaarkood waxbaa qaldami karo. Dhambaalka ugu weyn ee waalidiinta iyo daryeelayaasha waxaa weeye in arinka oo waqti hore la galo uu yahay habka ugu wanaagsan.

Caafimaadka, wanaagsanaanta iyo miisaanka
Jimicsi badan sameynta iyo si wanaagsan wax u cunidda ayaa muhiim u ah dhalinyarada wanaagsanaantooda. Buurnaantu waxay kordhisaa halista sonkorowga, cudurada wadnaha iyo kansarada qaarkood. Ku dhiiri geli ilmahaaga in ay cunaan quraacda, una dhig qudaar cuntooyinka fudud meelo ay si sahlan u gaaraan. Haddii aad ka welwelsan tahay miisaanka ilmahaaga habka uu cuntada u cuno, waxaad talo ka heli kartaa dhaqtarkaaga.

U xoogsheegashada
Waa maxay calaamadaha lagu garto in ilmahaaga loo xoogsheegtay? Waxyaalaha lagu garto waxaa ka mid noqon karo: calaamadaha jir ahaaneed sida dhaawac aan sharaxaad laheyn ama dhar jeexan; calaamadaha dhaqanka iyo dareenka sida baylahnimada dareenka, saaxiibtinimo kala noqoshada kooxaha, dugsi ka fogaanshaha, si dhibyar u xanaaqista ama dhaqanka horornimada. Haddii aad dareento mid ka mid ah arimahan, isku day in aad wada hadal furto. Haddii arintani adkaato, waxaa muhiim in aad dugsiga kala hadasho waxyaalaha aad ka welwelsan tahay.

Drugs'ka, aalkolada iyo sigaar cabista
Dhalinyarada waxaa dhici karto in ay ku bilaabaan drugs'ka, aalkolada iyo sigaar cabista dhowr sababood dartood. Isku day in aad ku baraarugsanaato astaamaha digniinta, sida miisaanka oo yaraado, saaxiibo bedelashada ama hoos u dhaca waxbarashada dugsiga. Si toos ah ugala hadal ilmahaaga waxyaalaha ku saabsan waxyeelada ay drugs'ka, aalkolada iyo sigaar cabistu noloshooda ku yeelan karto, bacdamaa ay muhiim u tahay in ay fahmaan halista ay leeyihiin waxyaalahan.

Si haboon u isticmaalidda internet
Internetku waa il macluumaad oo cajiib ah, laakiin waxay sidoo kale leedahay halisteeda. Waxaa muhiim ah in ilmahaagu ogyahay arimahan. U sheeg in aysan bixin faahfaahintooda muhiimka ah haddii ay doonayaa in ay iska qoraan bar internet, ha isticmaalaan emailka

qoyska qoyska si ay u helaan waraaqaha emailka. Ka fikir in aad isticmaasho software'ka wax nadiifiyo waxaadna eegtaa adeegyada ilaalinta carruurta ee uu leeyahay Bixiyaha Adeegga Internetkaga (ISP).

Galmada iyo xiriirada
Galmadu sharci ayay ka tahay gudaha England, Scotland iyo Wales marka la gaaro 16, iyo Waqooyiga Ireland aah ah 17. Waxaa dhici karto in ilmahaagu sameeyo xiriirro dhowdhow inta uusan gaarin da'dan. Haddii aad awooddo in aad ugala hadasho ilmahaaga xiriirada si furan oo dhiiri gelin leh, waxay aad ugu badan tahay in ay ka qaataan go'aan mas'uuliyadi ku dheehan tahay dhanka noloshooda quseeyo.

Uurka
Haddey inantaadu ogaato in ay uur leedahay, la taliyaheeda gaarka ah ee Connexions ayaa ka caawin karo sidii ay u heli laheyd adeegyada ilaha taageerada. Taa bedelkeeda, kala hadal Dhaqtarkaag Guud ururada taageerada bixiyo. La taliyayaasha gaarka ah ee Connexions ayaa iyaguna taageero siin karo aabayaasha dhlinyarada ah.

Brushes'ka sharciga
Dhalinyarada intooda badan ma jebiyaan sharciga, laakiin kuwa sidaa yeelo, waxay noqon kartaa astaan muujineyso in dhibaatooyin ka heysataan meelo kale. La taliyaha gaarka ah ee Connexions ee ilmahaaga ayaa idinka caawin adiga iyo ilmahaaga in la tacaashaan cawaaqibka dembiyada wuxuuna sidoo kale idinku xiri karaa hay'adaha gacanta ka geysan karo arinta keentay.

Ururada ku bixiyo macluumaadka iyo taageerada hal-ka-halka ah telefoon, email ama qadka online'ka ah:

Fure
Ku haboon dhalinyarada **Ku haboon waaldiinta** **Ku haboon qof kasta**

Taageero la xiriirto...	**Ogow xaqiiqooyinka**	**Hel taageero hal-ka-hal ah**
Wax kasta oo uu ilmahaagu ka welweli karo	**www.connexions-direct.com** **www.need2know.co.uk** **www.parentscentre.gov.uk** **www.youthinformation.com** **www.direct.gov.uk/youngpeople** **www.gingerbread.org.uk** **www.familyandparenting.org**	**Connexions Direct:** 080 800 13 2 19 (8:00 subaxnimo–2:00 galabnimo, 7 maalmood todobaadkii), ama qoraala : 07766 4 13 2 19, ama booqo: **www.connexions-direct.com** si aad email u dirto ama talo ku hel qadka online'ka ah ama talo ku hel qadka online'ka ah. **Childline:** 0800 1111 **www.there4me.com** (loogu talo galay 12–16 sano jirrada) **Parentline Plus:** 0808 800 2222 **www.parentlineplus.org.uk**

Caafimaadka iyo wanaagsanaanta ao ay ku jiraan jir ahaan caafimaadka qiirada, iyo si caafimaad leh u noolaashaha	**www.doctorann.org** **www.bbc.co.uk/surgery** **www.nhsdirect.nhs.uk** **www.youngminds.org.uk/youngpeople** **www.youngminds.org.uk/parents** **www.rd4u.org.uk (bereavement'ga)**	**NHS direct:** 0845 4647 **YoungMinds Adeegga Macluumaadka Waalidiinta:** 0800 018 2138 **Samaritans:** 08457 90 90 90 **www.samaritans.org.uk** jo@samaritans.org **RD4U** (bereavement'ga): 0808 808 1677
Badbaadsanaanta Oo ay ku jiraan drugs'ka aalkolada iyo sigaar cabista. U xoogsheegashada iyo amniga internetka	**http://units.nhs.uk** **www.re-solv.org (musalafnimada)** **www.sniffing.org.uk (musalafnimada)** **www.talktofrank.com (dhammaan drugs'ka la qabatimo)** **www.quitbecause.org.uk (sigaar cabista)** **www.dcsf.gov.uk/bullying** **www.direct.gov.uk/cyberbullying** **www.kidscape.org.uk (u xoogsheegasho)** **www.bullying.co.uk** **www.beatbullying.org** **www.thinkuknow.co.uk (amniga internetka)**	**Drinkline:** 0800 917 8282 **Frank** (drugs'ka): 0800 77 66 00 **www.talktofrank.com** **Narcotics Anonymous:** 0845 373 3366 ama 020 7730 0009 **Smoking Quitline:** 0800 00 22 00 **www.quit.org.uk** stopsmoking@quit.org.uk **Re-Solv** (solvents'ka): 01785 810762 **Bullying uk** (talo la xiriirto isku xoogsheegashada): help@bullying.co.uk
Galmada iyo xiriirada **Oo ay ku jiraan sharciga, rabitaan galmo, uurka, caafimaadka galmada iyo dhalmo joojiyayaasha**	**www.ruthinking.co.uk** **www.likeitis.org** **www.brook.org.uk**	**ruthinking qadka caawimaadda:** 0800 28 29 30 **Brook qadka caawimaadda** (wixii ka yar 25): 0800 0185 023
Brushes'ka sharciga	**www.rizer.co.uk**	

Connexions ma aha oo kali ah ka talo bixiyayaasha koorsooyinka iyo mehnadaaha… La taliyayaasha gaarka ah ee Connexions waxay siiyaan macluumaad, talo iyo taageero la taaban karo oo ku saab arimo kala duwan oo ay ku jiraan maaliyadda, caafimaadka iyadoo loo isticmaalayo waqtiga firaaqada hab bulshada lagu dhexgalayo, oo wanaagsan. Dhab ahaantii, waxay gacan ka geysan karaan wax kasto oo ku saameynayo ilmahaaga dugsiga, machadka, shaqada ama noloshooda gaarka ah ama tan qoyska.

Qaababka kale
Daabacaaddan waxaa lagu heli karaa Luuqadda indhoolayaasha ama CD dhegeysi.
Fadlan ka wac DCSF Publications halkan:
0845 602 2260 ama
E-mail: connexions@prolog.uk.com to order copies.

Tarjumaad ayaa la helayaa
Qayb qoraal kaliya oo ah Ingiriis, Carabi, Bengaali, Gujuraati, Hindi, jayniiska Mandarinka, Boolish, Bunjaabi, Somali, Turkish, Urduu iyo Fiitnaameys ayaa laga laga soo guurin karaa barta internetka: **www.connexions-direct.com/parentcarer**

Pdf iyo qayb qoraal kaliya ah ayaa laga helayaa qadka online'ka ah
www.connexions-direct.com/parentcarer
Waxaad isticmaali kartaa Kombiyuutar si aad u weyneyso qoraalka.

Ka talo bixin
Daabacaaddan waxaa la soo saaray iyadoo la metelayo DCSF ee VT Careers Management.

Waxaanu soo dhaweyneynaa ka talo bixinta Waalidiinta iyo Daryeelayaasha (Parents & Carers). Haddii aad heyso wax figrad ah oo ku saabsan waxa uu ka kooban yahay buugyarahan, ama sida loo soo bandhigay, fadlan kala xi riir
VT Careers Management halkan
E-mail: vtcm.publications@vtplc.com

Nuqullo kale oo buugyarahan ah waxaa laga heli karaa Waaxda Carruurta, Dugsiyada iyo Qoysaska (DCSF) halkan:

DCSF Publications
PO Box 5050
Sherwood
Nottingham
NG15 0DJ

Telefoon: 0845 602 2260
Fax: 0845 603 3360
E-mail: connexions@prolog.uk.com

ISBN: 0-86110-928-7

© Crown copyright 2008

Qaybo laga soo qaatay dokumeentigan dib waa loo daabici karaa iyadoo aan aheyn arin ganacsi lana xiriirto waxbarasho ama howlo tababar, iyadoo ay shardi tahay in la xuso isha laga soo xigtay.